


UN-HABITAT

Barnaamijka Deegaamaynta Aadamaha ee Qarammada Midoobay



11. Xubinta G/deegaanka oo ah Hay'ad Dhise





# Taxanaha Tababarka

Komishanka Yurub

## Xubinta G/deegaanka oo ah
# Hay'ad Dhise

### Tilmaame-bare 11

Tababarka Hoggaanka la doortay

**Xarunta QM ee Deegaamaynta Aadanaha (Habitat**

# Xubinta Golaha Deegaanku markuu yahay Hay'ad Dhise

## Tilmaame-baraha 11aad

## Tababarka Hoggaanka la soo doorto

**Tarjumaddii:Akaademiga Nabadda iyo Horumarka (APD)**

**Taxanaha Agabka Tababarka**

**Istanbul, 1996kii- "Shir-madaxeedkii Caasimadaha"**

**Sawirrada waxa iska leh Joel Elrod**
**Naqshadda iyo Jaan-goyntana Vicki Gillette**

**Xubinta Deegaanku markuu yahay Hay'ad Dhise**

**Taxanaha Agabka Tababarka**

**HS/717/04SO**

# HORDHAC

Sida ay muujisay natiijooyinka qiimaynta baahiyaha tababarka ee ay qabatay Xarunta QM ee Deegaamaynta Aadanaha (Habitat), baahiyaha tababarka ee khuseeya xubnaha golaha deegaanka la soo doortay ee Dowladaha Hoose ama siyaasiyiinta heer degmo, waxaa loo arkaa inay ku jiraan arrimaha caalam ahaan ugu muhiimsan, isla markaana, ugu danaynta yar dhinacyada dhismaha wax-qabadka ee horumarka Dowladaha Hoose iyo maamulkooda.

Sannadihii ugu danbeeyey, tiro dalal kala duwan ah, sida Nepal iyo Polland ama Uganda iyo Paruguay ayaa markii ugu horreysay muddo tobannaan sano ah qaatay nidaamka ay ku dooranayaan xubnaha golaha deegaanka iyo gudoomiyaasha/ maayarada halka meelaha qaarna weligood aysan dooran. Baahiyaha tababarka ee madaxda la soo doorto ee Dawladda Hoose waxay xagga sare ugaga jiraan ajendaha dimoqraadiyadaha Dowladaha hoosa ee cagaha loo taagay/dhismay, sida Ecuador, India iyo dalka Marykanka (USA).

Si wax looga qabto baahiyahan, Xarunta QM ee Deegaamaynta Aadanaha (HABITAT) waxay samaysay oo ay tijaabisay taxanayaal buugaag Tilmaame-barayaal ah oo tababarka ku lug leh si ay uga taageeraan Xubnaha Golaha Degaanka in ay matalaan muwaadiniinta, siiyaan hoggaaminta loo baahan yahay magaalo iyo dad ahaanba, si hawl-karnimo leh ula shaqeeyaan Dawladda Dhexe iyo maamulka, farsamo-yaqaannada iyo xirfadlayaasha sare ee shaqaalaha Dawladda Hoose iyo hay'adaha la hal-maala. Tilmaame-barayaashani waxay soo koobayaan siyaasad iyo go'aan-qaadasho, xiriirka, gorgortan iyo hoggaamin, ka-qayb-gelidda, agaasinka iyo hagidda shiraraka, xilalka karti-gelineed iyo fududeyneed ee xubinta Golaha Degaanka, maamulka maaliyadeed iyo arrimaha kale ee la hal-maala.

Tilmaame-barahan, Xubinta Golaha Degaanku markuu yahay Kartigaliye, wuxu ka mid yahay taxanayaal 12 ah, looguna talogalay, bilow ahaan, in ay adeegsadaan tababarayaasha hay'adaha tababarka qaranka ee Dawladda Hoose ama waaxaha tababarka ee ku dhex yaal Dowladaha Hoose. Si ay ugu noqoto taageero dheeraad ah tababarayaasha adeegsanaya Tilmaame-barayaashan, Xarunta QM ee Deegaamaynta Aadanuhu (HABITAT) waxa kale oo ay soo daabacday buug kale oo kaabaya ama wehel u ah taxanahan Tilmaame-barayaasha ah. Buuggan la yiraah "Tusaha Tababaraha ee Tababarka Saraakiisha la soo doorto" oo ka kooban qoraallo tababaraha khuseeya iyo macluumaadba, waxaa loogu talo-galay in tababaruhu uga faa'iidaysto qorshaynta aqoon-is-weydaarsiyada Saraakiisha la soo doortay ee ku salaysan Tilmaame-barayaashan.

Waxaa la filayaa in Tilmaame-barayaashani si weyn wax uga tari doonaan xoojinta dhismaha awoodda wax -qabad ee Dowladaha Hoose iyadoo la barayo ku dhaqanka hoggaaminta wacan, kuwaas oo ka mid ahaa ujeeddooyinkii waaweynaa ee 1996dii Shirweynihii Xarunta QM ee Deegaamaynta Aadanaha, Habitat II.

Waxaan u mahad-naqayaana Dr. Fred Fisher iyo Mudane David W.Tees kaalintii ay ka qaateen diyaarinta Tilmaame-barayaashan iyo kuwo kale oo ku jira taxanayaashan, iyaga oo la kaashaday shaqaalaha Xarunta QM ee Deegaamaynta Aadanaha (HABITAT) Qaybta Tababrka ee ka tirsan isla Xaruntaa QM oo ay taageero u fidisay Dawladda Netherlands. Waxa kale oo aan rabaa in aan xuso talooyinkii iyo tilmaamihii ay ku darsadeen Tabarayaasha iyo madaxda Dawladda Hoose ee Costa Rica, El Salvador, Kenya, Lithuania, Romania iyo Uganda ee naga caawiyay tijaabintii goobeed ee Tilmaame-barayaashan.

Dr. Wally N'Dow
Kaaliyaha Xoghayaha -Guud
Xarunta Qaramada Midoobay ee Deegaamaynta Aadanaha (Habitat)

# AQOONSI

Tarjumidda iyo habeynta af Soomaaliga ah ee Tilmaame-barayaasha Hoggaanka la soo doortay waxay ku hirgashay Barnaamajka Is-maamulka Fiican iyo Tababarka Hoggaanka la soo doortay ee ay maal-gelisay EU-da, isla markaana uu fuliyay Xafiis Goboleedka UN-HABITAT ee Afrika.

Tarjumidda iyo habeynta Af-Soomaaliga ah ee Tilmaame-barayaashan Tababarka Hoggaanka la soo doortay, waxaa ka hawl-galay koox tarjumidda ku xeel dheer oo ka tirsan: Akaademiyadda Nabadda iyo Horumarka, Jaamacadda Hargeysa iyo Jaamacadda Cammuud; iyaga oo ay ka caawisay Hay'adda QM ee HABITAT, laanteeda Hargeysa ku taal.

Mahad-naq gaar ah waxaa mudan Akaademiyadda Nabadda iyo Horumarka oo ka hawl-gashay tifaf-tirka iyo isu-ekeysiinta Tilmaame-barayaashan.

Waxaa kale oo mahad-naq mudan Jacfar Maxamed Gaaddaweyne oo Akaademiyadda Nabadda iyo Horumarka ee Somaliland ka tirsan, Maxamed Muumin oo Jaamacadda Bariga Afrika ee Puntland ka tirsan iyo Maxamed Afrax oo Xarunta Cilmi-baarista iyo Dood-wadaagga ee Koonfurta-Dhexe ee Soomaaliya ka tirsan, kuwaas oo wada diyaariyay tarjumidda ereyada Ingiriisiga ah ee Tilmaame-barayaashan ku jira.

Mahad-naq gaar ah waxa isna mudan Maciej Sudra oo diyaariyay astaamaha iyo naqshadaha jaldiyada Tilmaame-barayaashan.

Nuqulkan ugu danbeeya waxaa dib u eegis iyo dib u sixid ku sameeyay Khuburo ay wakiilatay Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta ee Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Hay'adda UN-Habitat Xafiiskeeda Muqdisho. Dib- u eegistan waxaa la sameeyay Oktoobar, 2018-kii

**Xagga koofiyadda.**

**Koofiyadda uu xiran yahay qofka geesta midigta ku sawiran laguna muujiyey bogaga soo socda waxa loo soo qaatay si loo bandhigo kaalinta uu ku jiro odayga deegaanku sida ku cad tilmaame-barahan**.

**Waa koofiyad maro ah oo ay xidhaan dadka beera xashiishadda nooca loo yaqaan “Opium-ka”ee ku nool xadka Pakistan**

# Halka uu kaga jiro tilmaame-barahan


| | Bogga |
|---|---|
| Sida loo isticmaalayo Tilmaame-Barahan | 1 |

**Qaybta 1aad**

| | |
|---|---|
| Qoraal ku saabsan Xubin golaha degaan marka uu yahay Hay'ad Dhise | 3 |
| Qeexid | 4 |
| Soo-ururin | 4 |
| Milicsi | 4 |
| Ka wada-Xaajood Dowr: Agab loo adeegsado hawlo badan | 5 |
| Aqoonsiga dhaqammada kala Duwan | 6 |
| Gorgortanka dowrka ee Golaha Degaanka iyo Shaqaalaha | 6 |
| Istraatiijiyadaha kale ee hore loogu marinayo golaha degaanka/ xil-gudashada shaqaalaha | 8 |
| Qiimaynta madaxa fulinta | 9 |
| Milicsi | 10 |
| Wax qabadka haya'edeed | 10 |
| Hay'ad dhisida: tan iyo wixii dhaafsiisan | 11 |
| Milicsi | 13 |
| Qiimaynta Hay'adda | 14 |
| Doldaloolooyinka fulinta | 14 |
| Hufnaan iyo Xisaabinta | 15 |
| Milicsi | 16 |
| Dhiiri-gelinta Hay'ad dhisida | 19 |
| Gebogebo | 19 |
| Qoddobo Muhiim ah | 20 |
| Raad-raac | 21 |

**Qaybta 2aad**

**Xubinta Degaanku markuu yahay Hay'ad Dhise**

| | |
|---|---|
| Aqoon-is-weydaarsi ku saabsan odayga Degaanku markuu yahay Hay'ad Dhise | 22 |
| Muuqaal Guud | 24 |
| 11.1 Layli diyaar garow ah: Dhibaatadu maxay tahay? | 26 |
| 11.2 Bandhigga tababaraha | 27 |
| 11.3 Dhacdooyinka halista ku ah waxqabadka hay'adeed | 28 |
| 11.4 Diraasad xaaladeed: wax-ka-bedelka qaabka xafiiska shaqaalaha ee Croptown | 30 |
| 11.5 Layli: gorgortanka kaalineeed ee Golaha shaqaalaha | 35 |
| 11.6 Dood hagan: qiimaynta shaqaalaha | 40 |
| 11.7 Layliga xirfad gudbinta | 42 |


**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

# SIDA LOO ISTICMAALAYO TILMAAME-BARAHAN

Tilmaame-barahan tababarka khuseeya lagana qoray mawduuca "Xubinta Deegaanku markuu yahay Hay'ad Dhise", sida kuwa kale ee taxanahan ka mid ah, waxa loo isticmaali karaaa siyaabo dhowr ah.

## Wax isbarid

Qormada lagu furay buuggan waxaa loogu talagalay inaad wax is-farid. Waxaad u baahanaysaa oo keliya waxa weeye meel aan buuq lahayn oo aad ku fekerto, waqti iyo wixii aad wax ku qori lahayd. Si aad natiijooyinka ugu wanaagsan u gaarto, waxaanu kugu dhiirrigelinaynaa inaad qoraal ka dhigto jawaabaha su'aalaha hadba lagaa weydiiyo qoraalkaas tafaasiisha leh. Qiimaha barashada warka ayaa loo bar-balaariyay akhristaha dhowr jeer, isagoo waqti ku qaadanaya si uu arrintaas u qabto.

## Tababarka aqoon-is-weydaarsiga

Qoraalada kooban iyo murtida layliga ee tababaraha kuna jira buuggan hagitaanka waxaa loo qoondeeyey inay isticmaalaan ama ku dhaqmaan tababarayaal waaya-aragnimo u leh aqoon-isweydaarsadka tababarka, kuwaasoo loogu talagalay xubnno deegaan ka kala yimaadda dawlado hoose oo kala duwan. Waxaanu ku soo darnay noocyo kala geddisan oo hawlaha barashada iyo qaabab dookumanti si ay u siiyaan tababarayaasha jajabnaan badan ama kala dowrasho badan markay qabanayaan aqoon – isweydaarsi ku habboon baahiyaha cayiman ee xubnaha deegaanka ka soo qaybgelaya. Ku talagalkayagu wuxu ahaa markii aanu gelaynay hawsha buuggan inaanu kugu dhiirrigelino tababare ahaan si aad ugu soo biirsato ama u kuur geshid khibradahaagii, korna ugu qaaddo tayada barashada ee nuxurka tababarka uguna gudbiso Xubnaha deegaanka ee ka soo qaybgala.

**Xubinta Degaanku markuu yahay Hay'ad Dhise**

Tababare ahaan, waxa laga yaabaa inaad go'aansato inaad ugu dhaqanto murtida buuggan ku jirta sida rasmiga ah ee ay isu xig-xigto iyo qaabka loo soo dhigay. Ha yeeshee, haddii aad dowr biddo, dib ayaad u nidaamin kartaa ama aad u hagaajin kartaa murtida luqadda sida hadba loogu baahan yahay in lagu helo ulajeedooyinka xaalad tababar oo gaar ah. Waxaad dowran kartaa inaad siiso muddo saddex saacadood oo tababarid ah iyo hawlo muhiim ah oo ku jira buuggan. Ama waxaad ka faa'iidaysan kartaa murtida badan ee uu buuggu ka kooban yahay adigoo ku kordhinaya/ raacinaya mid aad adigu iska leedahay si aad u gaarsiiso xilliga barnaamijka maalin dhan.

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

Buuggan talabixinta ahi wuxuu ka mid yahay taxanayaal 12 ah oo ku saabsan tababaridda hoggaanka la soo doorto. Waxad go'aan ku gaari kartaa amase lagaa codsan karaaa inaad qabato aqoon-isweydaarsi lagaa rabo inaad isticmaasho buug wax ka badan ama dhammaantood xilli intaas ka badan gudihii. Iyadoo buug kasta gaarkiisa loo isticmaali karo, haddana marka sida ay isu xig-xigaan loo isticmaalo waxay siin kartaa Xubnaha deegaanka ee ka soo qaybgalayaasha ah waaya aragnimo barasho oo awood midaysana leh.

## Tababar-kooxeedka

Murtidan waxa kale oo loo isticmaali karaaa, iyadoo dowrbidasho ahaan lala kaashanayo tababare khibrad leh ama hawl fududeeye, taasoo hore loogu marinayo xilgudashada Xubnaha deegaanka oo isla gole qudha ka wada shaqeeya. Marka la tababarayo xubnna deegaan meel ka wada shaqeeya, waxaanu rumaysanahay hawl fududeeyuhu ama suurtageliyuhu inuu u diyaar garoobo habaynta hawlaha tababarka ee ku qoran buuggan talabixinta ah siyaabo kala duwan. Waxa iman karaa munaasabado adigoo ah hawl fududeeye, aad dowr biddo inaad la timaaddo hawlo cusub arrintaasoo ku xiran hadba xaaladda iyo dhaqanka ay ku sugan tahay kooxdu. Xaaladaha sidaas oo kale ah waxaanu rajaynaynaa inaad u aragto buuggan sidii "Sanduukha agabka" oo ay ku jiraan fekrado badan oo tababar la xiriira lana kala dowr dowran karo si la isugu dhafo la isuna dhinac dhigo, loo hagaajiyo amase looga guuro siday xaaladdu ama duruuftu kugu kalifto.

Waxaad haysataa waxyaale badan oo aad kala dowr-dowran karto adigoo adeegsanaya buugaagtan. Waxaanu rajaynaynaa inaad si buuxda uga faa'iidaysan doontaan.

**Xubinta Degaanku markuu yahay Hay'ad Dhise**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

# Qeybta 1aad

## Qormo

# Xubinta Deegaanku markuu yahay Hay'ad Dhise

**Xubinta Degaanku markuu yahay Hay'ad Dhise**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

**Qormo**

## Qeexid

Xubinta deegaanku marka uu ku jiro kaalinta Hay'ad dhise, wuxuu taakuleeyaa harumarka maamulka shaqaalaha iyo hay'adda Dowladda Hoose siday u tahay mas'uuliyad muhiimka u ah hoggaanka la dowrtay.

## Soo-ururin

Horumarka hay'adeed, amase dhismaha awoodda waxqabad sida inta badan ay u yaqaaniin xubnaha hay'adaha gargaarka debedda wuxu dhibaato ku noqdaa hawlaha fir-fircoon ee Dowladda Hoose. Waxaynu eegi doonnaa saddex dhinac oo ay leedahay kaalinta hay'ad dhisuhu: xiriirka u dhexeeya golaha iyo shaqaalaha; harumarka shaqaalaha; iyo hababka loo dhiso awoodda waxqabad ee gabi ahaanba hay'adda.

> ***Gacan keliya sacab ma garaacdo/ tunto***
> ***- Qarsoodi***

## Milicsi

Marka aan ka fekero kaalintayda ah Hay'ad Dhise ee Golaha Deegaanka, waxa ugu horreeya ee maskaxdayda ku soo dhacaa waa sidan hoos ku qoran:

**Xubinta Degaanku markuu yahay Hay'ad Dhise**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

**Qormo**

# Dowr wada Xaajood: Agab loo adeegsado hawlo badan

Ka hor intaynaan guda gelin baaritaanka caqabadaha xiriirka u dhexeeya golaha degaanka iyo shaqaalaha, waxaanu doonaynaa inaanu soo qaadno hannaan gor-gortan oo si ballaaran loogu dhaqmo marka laga dhigayo hay'ad Dowladda Hoose oo kale ah, mid u shaqaysa si aad u firfircoon oo aad u karti badan. Marka aynu wada hadal guud kasii yeelano gor-gortan dowr ama kaalin kadib, waxaynu jalleeci doonaa sida loo isticmaalayo marka la sii wanaajinayo wax qabadka Golaha Deegaanka iyo shaqaalaha.

Imisa jeer, waayo-aragnimadaada sida saraakiisha la soo dowrtay, miyaad dhib kala kulantay xubnaha kale ee "qoyska rasmiga ah" ee Dowlad Hoose ama khibrad u leh inay la shaqeeyaan qof heer qaran? Ama waxaaba laga yaabaa inaad indhaha saartay Golaha Deegaanka oo ay dhibaato ka haysato kala saaridda dowrka ay ka ciyaari karto iyo kaalinta ay leeyihiin guddi kale oo rasmi ah, sida guddida qorshaynta, amase xidhiidhka uu la leeyahay shaqaalaha. Noocyada sidaas ah ee dadku iskaga hor yimaaddo kaalinta, amase mad madow dowrka la ciyaarayo la xiriira, waa qaar caan ah, waxaanay si dhakhso leh ugu kaallifaan dadka wada shaqayn la leh hay'ado inay dejiyaan istraatiijiyo wax lagaga qabto. Waxaana mid lala fejeco aan ahayn in hawlgalka noocaas ah loo bixiyo gorgortan kaalineed. Gor-gortanka kaalineed waa wax fudud oo la fahmi karo. Mar haddii adiga iyo qofka/ dhinaca kale aad go'aansataan inaad wada fariisataan oo aad ka wada xaajootaan kaalmahiina/ dowrarka aad kala leedihiin (Sidaasi haddii ay dhacdo dhinaca/ qofka kale wuxu dareemayaa in loo baahan yahay inuu eego arrinka dowrka isaguna qabto waqti iyo meel la isugu yimaado wada hadalka. Waxaad soo qabataa/ magacowdaa goob sanqar yar, raaxo leh iyo nefis iyo xilli labadiina dhinacba u fudud idinsiiyana waqti aad labadiinuba soo fiir-fiiriyaan arrimaha laga wada xaajoon doono intaydaan isu iman ka hor. Si ay kuugu sahlanaato u diyaar garowga kulanku, waxaa lagugu talasiinayaa in dhinac kastaaba uu soo buuxiyo foom (form) ka kooban warbixinaha hoos ku cad:

1. Haddii (tusaale, kooxda maamulku) ay tahay inaad qabataan arrimaha soo socda muddadii hore in ka badan, ama sidii hore ka wanaagsan, waxaad naga caawinaysaa (masalan, gole deegaan ahaan) inaanu siyaadino hawl-karnimadayada.
2. Haddii ay tahay inaad dhintaan qabashada ammuuraha soo socda, ama aad joojisaanba, waxay taasi naga caawinaysaa inaanu kordhino fir-fircoonidayada.
3. Arrimaha hoos ku qoran ee aad qabanayseen waxay naga taageerayaan sidii aanu u kordhin lahayn hawl-karnimadayada, waxaannaanu rajaynaynaa inaad sii waddaan.

**Xubinta Degaanku markuu yahay Hay'ad Dhise**

Tani waxay u muuqataa hab fudud oo loo isticmaali sida lagu kala caddaynayo dowrarka ay kala leeyihiin shakhsiyaadka, kooxaha iyo hay'adaha. Dowrka gor-gortanku wuxuu u baahan yahay jawi u furan labada dhan, kaasoo la'aantii ku noqda hay'ado badan dhagaxa weyn ee lagu turunturoodo. Waxaa kale oo loo baahan yahay deegaan ka caagan doonis isku xurmayn derejo oo dhextimaadda kuwa isku dayaya inay ka heshiiyaan khilaafka dhexyaalla.

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

**Qormo**

## Aqoonsiga kala duwanaanshaha dhaqanka

Waxaynu ognahay xurmo-oonka, dabci adayga iyo furfurnaantu inay yihiin dhaqano gaar ah oo xasaasi ah, ha yeeshee, dhinacyadan ka mid ah hawlkarnimada hay'adda waxa suuragal ah in uu isbeddel ku yimaaddo. Waxaynu ka wada hadli doonnaa waxa loo yaaqaanno "Maareynta Tayada" mar dambe oo qoraalka faahfaahsan intayny ku guda jirno qormadan. Isugaynta maamulka tayo waxa weeye istaraatiijiyo maamul oo ka timid dalka Japan kuna faaftay Maraykanka iyo Europe iyadoo socdaalkeedaasi kaga soo gudubtay xuduudaha dhaqanka. Markii ay shirkado Maraykan ah iyo Dowladda Hoose ay isticmaaleen qaabkan, hay'ado badani waxay u baahdeen inay u bareeraan (waajahaan) arrimo u dhow inay xasaasi noqdaan, sida xaaladda kaalineed, caqabadaha/ waxyaalaha is-hortaagga ku noqda wada hadalka ee dhexgala qaybaha shaqaynaya, iyo xuduudaha saraakiisha awaamirta aan ka leex-leexan. Waxaa ku kallifay hay'adahaas inay ku shaqeeyaan MaareyntaTayada iyo inay la yimaaddaan isbeddello xagga dhaqanka shaqada, waxay ahayd rabitaankooda hawlkarnimo iyo tartan dheeraad ah inay galaan. Dhaqanka hay'aduhu wuu isbeddeli karaa, waana inuu isbedelo, haddii dowladaha hoose ay noqdaan qaar ku guulaysta daboolidda baahida cod bixiyayaashooda. Waxaa niyadsamaan leh in la ogaado inay jiraan qaabab ama xirfado ka caawiya hay'adaha sida Dowladda Hoose sidii ay u heli lahaayeen is beddelo dhinaca dhaqanka ama dabeecadaha ah markay dadaal ugu jiraan inay u nuglaadaan baahiyaha is beddel ee cod bixiyayaashooda.

## Kaalin Gorgortan ee Gole Deegaan iyo Shaqaale

Golayaasha Degaanka intooda badan way soo maraan iska horimaadyo ku lug leh dowrka/ kaalinta amase mad-madowyo dhexmara shaqaalaha Dowladda Hoose. Waxaynu ka soo qaadaynaa inaad rabto xaaladdani inay isbeddesho. Kadib markaad la jeex-jeexdo suurtaygalnimada gorgortanka dowr ee u dhaxeeya Golaha Deegaanka iyo shaqaalaha (madaxda maamulka ama xubno shaqaale oo muhiim ah), waxaad abaabuli kartaa fadhigu waqtiga uu noqon karo. Abaabulkaasi waxa ka mid ah taariikh qabasho, goobta kulanka iyo gacan u gelinta foomka ay ku qoran yihiin warbixinaha kor ku xusan. Waa in dhinac kastaba la amro inay ku dhammaystiraan warbixinahaas foomka iyagoo qoran.

**Xubinta Degaanku markuu yahay Hay'ad Dhise**

Kaalinta Gorgortanku wuxuu faa'iido weyn keeni karaaa marka hawl fududayn laga helo dhinac saddexaad. Waxaa laga yaabaa inaad doonayso inaad marti qaaddo tababare ka socda machadka taabarka ee Dowladda Hoose ee aad ka tirsan tahay si uu kaaga taageero howshan. Tababarahaasi waa inuu xirfad u leeyahay sida loo maareeyo awoodda dhaq-dhaqaaq ee koox dhexdood ah iyo sifa faalaha loo xalliyo dhibaatooyinka kooxda.

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

Laba siyaabood ayaa loo maarayn karaaa howshan. Labada kooxood (golaha iyo shaqaalaha) ayaa uga jawaabi karaa warbixinaha si guud ama si cayiman. Tusaale ahaan, waxay u isticmaali karaaan warbixinaha si ay u raadiyaan ama u helaan falalka shakhsi xubin gole ah, kaasoo ku kacaya falal ka xanaajiya xubin shaqaale, sida agaasimaha maaliyadda. Maaraynta labaad (tan abbaaraysa dhaqanka qof ahaan) waxay noqon kartaa mid xoogaa adkaata, laakiin dhalin karta natiiyooyin wanaagsan waaga dambe.

**Qormo**

Haddii wax iska caabbin ama mucaaridnimo aad kala kulanto maarayntan qofka, waxaad had iyo jeer ku bilaabi kartaa gorgortanka koox-kooxda ah adigoo aad wax usii caddaynaya hadba marka ay dhinacyada is-hayaa u soo debcaan maarayntа ee aad ka aragto natiijooyin uu mira dhalinayo dadaalkaagii.
Markaad isu keento nuqulada foomamka la soo buuxiyey waa in la is weydaarsado, wada xaajoodna la bilaabo. Waxaa muhiim ah in lagu koobo su'aalaha hore kuwa kala caddayn karaa mawaadiicda ku taxan foomamka. Waxaa imaan doona waqti si weyn loo falanqayn doono qodobada. Iyadoo dhinac uu soo bandhigi karo warkiisa iyo ra'yigiisa intaan kan kale ka warbixin, waxaa laga yaabaa inay ka hawlkarnimo badan tahay inuu dhinac kastaaba soo bandhigo jawaabihiisa intaan kan kale loo gudbin. Haddii aad u isticmaasho maarayntan hadba koox ka warbixinta ah, waxay ahaanaysaa inaad sugto inta caddaymaha shaqada ee saddexda ah laga warbixinayo, muddadaas oo in laga wada hadlo arrinkaas aanay suurageli karin. Sababta keenaysaana waxay tahay waxa suurtagal ah in warku uu sii tarmo ama bato soo jeedimahaa lagu daray liis kasta.

Tusaale, shaqaaluhu waxay sheegi karaaan inay doonayaan in goluhu uu dhimo booqashooyinka kediska ah ee u ku tago qaybaha shaqaynaya si ay "u soo arkaan hawshu sida ay socoto". Dhinaca kale haddii aynu ka eegno, waxa dhici karta goluhu inuu doono in qaybaha shaqooyinka hayaa ay toddobaad walba u soo gudbiyaan golaha warbixino si ay ula socdaan harumarka ay waax kastaaba gaartay. Marka labadaas ammuurood la falanqeeyo, shaqaaluhu waxay u dhow yihiin inay ogolaadaan inay diraan warbixinaha, goluhuna uu yeelo inuu joojiyo caadada soo indha-indhaynta mar-marka ah ee goobaha shaqada.

**Xubinta Degaanku markuu yahay Hay'ad Dhise**

Kadib marka dhinac walba uu warbixiyo sharaxana liiskiisa qodobada ku yaal ee uu ku gorgortamayo, isu geynta kooxuhu waxay dib u eegayaan liisaska arrimaha is raaci karaa (sida tusaalaha hadda lagu siiyey) waxaanay ku heshiinayaan ama isla meel dhigayaan liis waxqabad oo labada dhinacba khuseeya kaasoo ka jawaabaya soo-jeedimihii iyo dabagalkii wada hadalka. Marka dib loo fiiriyo mawaadiicda oo dhan tallaabooyinka waxqabadka u baahana la dejiyo, qof ayaa iskii ku tadawacaya ama loo xilsaarayaa inuu diyaariyo warbixin taxaysa qodobada dhammaantood iyo waxqabadyada la siku raacay. Dhinac walba waa inuu galo heerka gorgortanka ee layligan diyaarna u yahay inuu ku dhawaaqo "haa", ama "maya" , ama "waxaanu u baahanahay war dheeraad ah" oo ah waxqabad kasta ee la tixgeliyo. Labada kooxoodba waa inay kulan yeeshaan xilliyada qaarkood si ay dib ugu jallecaan in wixii lagu heshiiyey siday ahaayeen loo fuliyey go'aansadaana in maaddooyin kale ay fiiro u baahan yihiin.

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

> ***Jirridda geedka Lotuska ayaa sheegta inta ay biyuhu hoos jiraan***
>
> ***Maahmaahdee Thai***

**Qormo**

# Istaraatiijiyadaha kale ee hore loogu marinayo xil gudashada Golaha Deegaanka ama shaqaalaha

Dhinaca kale ee xiriirka u dhexeeya Golaha Deegaanka iyo shaqaalaha ee si weyn u carqaladaysan mar-marna dumiye ah waxa weeye masuuliyadda golaha ee ku lug leh qiimaynta xil gudashada ama waxqabadka. Qiimayntu waxay ku dhacdaa laba heer: b) qiimaynta waxqabadka shakhsi, iyo t) qiimaynta waxqabadka waax hay'adeed ama hay'adda gebi ahaanteed. Aan fiirino, marka hore arrimaha qaar ka mid ah qiimaynta xubnaha shaqaalaha si gaar-gaar ah.

Marka hore tijaabinta/ qiimaynta shaqaalaha dawladda hoose inta badan waxaa yeerisa oo go'aansata dawladda dhexe. Markaad xaqiiqadaas ogtahay, way adag tahay waana ad-adeyg inaad si xaddidan ama qeexan uga sheekayso mas'uuliyaddan ku jirta qoraalkan faahfaahsan. Waxaanay u dhowdahay inay aad ugu adkaato golaha beddelada qaabkan ah, haddii ay fursaddu tahay mid waddani ah.

Mar labaadka, goluhu waa inuu ku yeesho kaalin xaddidan qiimaynta shaqaalaha, ugu yaraan si toos ah. Sida amarka guud uu dhigayo, Xubnaha deegaanku waa inay isku hawlaan keliya qiimaynta wax qabadka ama xilgudashada madaxda fulinta iyo haddii laga tegi wayo karraaaniga golaha. Waxaanu niri "waa inuu" laakiin waxaa jira waxyaalo ka reeban. Haddii Dowladda Hoose ee aad shaqada ka hayso ay tahay mid yar, Xubnaha deegaanka waxaa laga fili karaaa inay masuulliyad toos ah ku lahaadaan maamulka waaxaha. Haddii arrinku uu sidaas yahay, Xubnaha deegaanku waxay u aaminsanaan karaaan inay leeyihiin xilka qiimaynta. Si kastaba ha ahaatee, waxay caadadu tahay madaxda shaqaaluhu ay tooska u hoos yimaaddaan ee shaqaaluhu inay u xilsaaran yihiin qiimaynta, inkastoo qaar kale ay qabaan in dib loo fiiriyo masuuliyadda madaxda ama kormeerayaasha ee qiimaynta shaqaalaha. Hay'adaha qaarkood waxay isticmaalaan kooxo wax qiimeeya oo ka kooban odayaal guurti ah, halka ay qaar kalena ay ku soo dirsadaan shaqaale hoosaadka oo ay u keenaan qofka la qiimaynayo (haddii ay jiraan shaqaale hoose) marka lagu gudajiro hawsha qiimaynta.

**Xubinta Degaanku markuu yahay Hay'ad Dhise**

Marka saddexaadka, iyadoo ay jirto Xubnaha deegaanku inaysan toos ugu shaqa lahayn qiimaynta shaqaalaha, waxaa haddana jira dowr muhiim ah oo uu ka geli karo goluhu howshan. Dowrkaas goluhu wuxu yahay inuu hubiyo hawshii qiimaynta xilgudashada (oo ah mid daboolaysa baahiyaha hay'adda iyo maamulkaba) inay u socoto si hawlkarinimo leh una shaqaynayso si hawlkarnimo leh. Hawsha qiimaynta ee firfircooni waa inay yeelato dhaqano dhowr ah. Waa inay ahaato:

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

- Mid rasmiya, heerkii la rabay gaarsiisan, ujeeddana leh;
- Mid ku lug leh shaqada iyo waxqabadka;
- Mid ku xiran tafaasiisha hawleed ee rasmiga ah, waafaqsana xilalka qofka shaqaalaha ah;
- Mid loo isticmaalo qiimaynta qofka ee kormeere ahaan iyadoo kaliya loo isticmaalaayo hal qayb oo ka mid ah habka qiimeynta balaaran ee waxqabadka shaqaalaha.

**Qormo**

- Mid loogu talagalay in ay ka helaan tababar xirfadeed kuwa qabanaya qiimaynta waxqabad;
- Mid qayb lagama maarmaan ah ka noqda go'aanada ku lug leh dallacaadda, bedelka,ama haddii loo baahdo tallaabooyin habsami ah qaadi karaa eryi karaana xubin shaqaale ah;
- Mid u barta go'aaminta la xiriira horudhigidda ashkhaasta shaqaalaha ah iyo weliba barnaamijyada lagu abaabulayo kooxo shaqo iyo hay'adda gebi ahaanteed.

Haddii aan dib ugu noqdo qodob hore aynu u soo marnay, Golaha Deegaanku, wax yar ma ahee, waa inaanu ku lug yeelan xilka qiimaynta shaqaalaha. Hasa yeeshee, Goluhu wuxu u baahan yahay inuu qaban-qaabo ku yeesho mowqifyada ama halka uu ka taagan yahay siyaasadda ee: b) la socon karaa caadooyinka qiimaynta waxqabadka shaqaalaha ee la aqbali karo; t) in uu u tiiriyo maamulidda barnaamijka si caddaaladdi ku jirto oo ujeeddo leh; in uu hore u mariyo waxqabadka shaqada.

## Qiimaynta madaxa fulinta

Shakhsiga ay tahay goluhu inuu si caadi ah u qiimeeyo wuxu yahay madaxa fulinta hay'adda Dowladda Hoose. Waxaa raaca dookumantiga gaarsiisan heerka la rabo ee loo dejiyey qiimaynta madaxa fulinta, qiimayntu waa inay tixgelisaa dhinacyo saddex ah oo khuseeya waxqabadkiisa/ keeda:

1. Xiriirka shaqo ee uu la leeyahay golaha, shaqaalaha iyo shicibka waddaniyiinta ah.
2. Hadafyada iyo ujeeddooyinka la gaaray.
3. Karti loogu sameeyo hoggaan maamul kaalinta iyo jagada.

**Xubinta Degaanku markuu yahay Hay'ad Dhise**

Dhammaan dhinacyadaas ku saabsan dib-u-eegidda waxqabadka waxay u baahan yihiin heerar ugu wanaagsan in la gaarsiiyo iyo meelo laga qiyaas qaato oo ah dhaqamada la aqbali karo, kuwaasoo lagu qiimeeyo madaxa fulinta. Arrintaasina ma aha wax fudud. Haddana, iyadoo aan la hayn xaqiiqo la wada ogolyahay oo ku salaysan inay labada dhinacba falanqayn karaaan waxqabadka,waxaa mar uun adkaanaysa in go'aamo laga gaadho mustaqbalka madaxa fulinta ee hay'adda.

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

Taas micneheedu waxa weeye, iyadoo arrimo kalena ay jiraan , golaha iyo madaxa fulintu waa inay isku afgartaan waxa laga filayo madaxa fulinta, maaha oo qura dhinaca golaha iyo xubnaha ku jira, ee waxa weeye arrimaha u dhexeeya madaxa fulinta, shaqaalaha iyo muwaadiniinta. Waxyaabahaas la filayaa waa inay daboolaan dano kala duwan, kuwaasoo ay ku jiraan:

- Wax qabadka barnaamijka iyo maaliyad kantaroolidda (taasoo si sahlan loo soo

**Qormo**

saaro);

- Lama taabtaanka, sida la xiriirka iyo aaminaadda oo lala yeesho hay'adaha, shirkadaha ay dantu ka dhaxayso dawladda hoose; iyo
- Maamulidda hay'ad firfircoo oo karti badan.

Waxyaalahaas la filayo oo dhan waa in lagu hirgeliyo qoraal ahaan iyadoo ay weheliyaan hawlaha cayiman iyo mas'uuliyadaha ku jira caddaynta jagada ama qeexidda shaqada.

## Milicsi

Sidee ayuu golahaaga deegaanku u qiimeeyaa hawlqabadka madaxa fulinta dowladda hoose? Ma u malaynaysaa nidaamkiina waqtigan xaadirka ah lagu dhaqmaa inuu yahay mid hawlkar ah? Isbeddello sidee ah ayaad jeceshahay inaad ku aragto qaabka loo qiimeeyo waxqabadka madaxa fulinta?

**Xubinta Degaanku markuu yahay Hay'ad Dhise**

## Wax qabadka Haya'edeed

Dhinaca ugu dambeeya ee qiimaynta hawl qabadka ee aanu rabno inaanu ka warrano waxay tahay hay'adda. Waxaa ka mid ah hababka ugu firfircoon ee loo qaban karo qiimaynta noocan oo kale ah waa mid ka dhan ah barnaamijiyada hore loo sii go'aamiyo iyo hadafyada adeegga iyo waxsoosaarka. Dabcan halkan waxaynu ka soo qaadaynaa in hadafyada iyo wax soosaarka loo dejiyey sidii ay yihiin qayb ka mid ah miisaaniyadda amase hawsha qorshaha istaraatiijiyadda. Waax kasta iyo unugga hay'adaada Dowlad Hoose waa in lagu dhiirrigeliyo inay aasaasaan wax soosaar adag oo run ah lana qiyaasi karo/ bartilmaameedyada wax soosaar ama hadafyada la samaysto xilliga miisaaniyadda iyadoo lala kaashanayo golaha. Hadii golihiinnu uu

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

**Qormo**

guddiyo ahaan ku shaqeeyo marka uu diyaarinayo miisaaniyadaha waaxaha ama kuwa barnaamijyada gaar ahaaneed, markaasoo ay tahay guddiyadaasi inay ka dhigaan tan qayb ka mid ah falanqaynta miisaaniyadooda ay la yeelanayaan shaqaalaha ka hor intaan talooyinka maalgelinta la hor keenin golaha oo isu dhan (haddii ay tani tahay qaabkiinu sida uu u shaqeeyo).

Soosaarka ama natiijada la sii kala bixiyaa waxay ka taageertaa Golaha iyo shaqaalaha inay sameeyaan qiimayn xil gudasho sannad maaliyadeedka oo dhan. Waxa kale oo ay siiyaan golaha war aan qiima weyn lahayn oo khuseeya helidda sida lacagaha loo qorsheeyo miisaaniyadaha mustaqbalka. Warbixinta qiimaynta ee barnaamijiyada kala duwan iyo adeegyada ee aad u fidinayso codbixiyayaashada la'aanteed, waa ma dhacdo inaad go'aamo caqligal ah ka gaarto sidii aad ugu qaybin lahayd khayraad ama kharashyo tirsan dano tartan ku jira iyo baahiyaha.

## Hay'ad Dhisida : tan iyo wixii dhaafsiisan

Waxaynu soo marnay laba arrimood oo dhinaato ka dhex abuura golayaal badan iyo shaqaalahooda, iska hor imaadka kaalineed iyo qiimaynta hawlqabasho. Marka laga hadlayo harumarka hay'adeed, labada mawduucba waa muhiim, laakiin waxay qayb ka yihiin caqabadaha la xiriira dhismaha awoodda waxqabad ee dowladdiina hoose. Waxa jira maaddado kale, ama fursado lagu xoogayn karo hay'adaha, ha yeeshee marka hore waxaanu doonaynaa inaanu galno ama wax ka qabano duruufo loo arko lagama gudbaan oo ka hor yimaadda golayaal badan.

**Xubinta Degaanku markuu yahay Hay'ad Dhise**

Waxa ma huraan ah goluhu inuu lahaado shaqaale aad u xilkas ah oo karti badan si ay u fuliyaan/ hirgeliyaan siyaasadaha iyo barnaamijiyada. Shaqaalaha noocaas ah la'aantood, fursadihii ay ku noqon lahaayeen hawlkar aad ayey u yar yihiin. Runtu waa sidaas, xataa haddii Dowladda Hoose ay si weyn ugu tiirsato hay'adaha aan dowladda ahayn iyo waaxda gaar ahaaneed oo ay u fuliyaan qaybo ballaaran oo barnaamijyada ah. Laakiin, waxaad oranaysaa, waxaanu haynaa shaqaale hadda mushahar yar qaata, xirfad ku filana aan lahayn oo aan niyadsamayn ama himilo lahayn. Magdhowga arrimahaasi waxaannu qiraynaa inuu adag yahay. Haddii dowladdiina hoose aanay bixinayn gunno ama mushahar lagu noolaan karo waxay shaqalaha ku qasbaysaa inay raadsadaan meelo kale oo uu dakhli ka soo galo. Dakhli raadintaas shaqada dibadda uga baxsan waxa suuragal ah inay keento waqtigii iyo awooddii oo is dhima, shaqaaluhu waa inay daacad u ahaadaan shaqooyinka ay ka hayaan dawladda hoose, waxaanay ku abuuri karaaan hay'adda iyo maamulayaasheeda cillado gaar ah oo dhinac khal-khal geliya.

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

Hor iyo horraan, kaabidda shaqaalaha ee aan ku filnayn waxay dhalisaa dhibaato ku yimaadda xubnaha dadweynaha codbixiyayaashaada. Waxaad ka soo qaaddaa dhibaayooyinka ganacisga oo yimid hoolka magaalada si ay u cusboonaystaan ogolaanshihii ganacsiga cid hawshaas u qabatana ka waayey meeshii. Arrintaasi waxay caro gelin kartaa shaqaalaha isku deyaya inay ka soo baxaan ballankii ahaa inay si buuxda shaqadooda u qabsadaan (saacadna aanay maqnaan). Waxay burburin kartaa waxa lagu sheegi karo habsami shaqo ama dhaqan shaqo oo laga yaabo in la soo dhisaayey hay'adda dhexdeeda sannado badan. Dabcan, way adag

**Qormo**

tahay inay wax weyni ku qabsoomaan duruufahan oo kale.

Waxaan shaki lahayn aamuurtani inay mid caan ah tahay. Iyadoo aanay hawl-yarayn sida looga baxo meeshaas dhiiqada leh, haddana waxa jira istaraatiijiyo ka caawin karaa dawladaha hoose siday u soo ceshan lahaayeen xakaynta looga baahan yahay in lagu dhiso hay'ad adag oo wax soo saar leh. Hoos waxa ku muujisan talooyin aan badnayn:

- Dhin ama yaree shaqaalaha si aad u cayriso "kuwa nafahooda ama qolofkooda oo keliya ah ay kula joogaan" iyo weliba qaar kale oo aan wax soo saar lahayn. Dib u shaxee wixii dhigaal ah oo u qoondee amase u hur kuwa daacadda ah ee wax soo saar ka leh. Waxaa laga yaabaa inaad tiraaho arrinkaasi siyaasad ahaan ayaan loo aqbali karin, kaasoo aanu ku jawaabi lahayn "Sidaasi ma ka dhigaysaa siyaasad ahaan wax la aqbali karo maamulidda Dowlad Hoose oo aan wax karti ah lahayn, waxbana aan u qabanayn cod-bixiyayaashaada?"
- Waxaad soo heshaa habab kala dowrasho leh oo kale oo laga helo adeegyada qaarkood. Fiiri adeegsiga hay'adaha aan dawliga ahayn iyo istaraatiijiyadaha maamulka bulshada si ay ugu "suurtagasho" codbixiyaashaada inay bixiyaan adeegyadooda qaar ka mid ah. Qandaraas la gal shirkadaha waax gaar ah inay hirgeliyaan adeegyada qaarkood, kuwaasoo wax u qabanaaya si ka qiima jaban sida Dowladda Hoose ay ugu kharash garowdo shaqaalaheeda. Adeegga had iyo jeer maskaxda ku soo dhacaa a qaadista qashinka, ha yeeshee waxa jira qaar kale oo badan.

- Waxaad u soo dejisaa jidwal talantaali shaqo shaqaalaha aan awoodin inay saacadaha shaqo oo dhan joogaan Dowlad Hoose iyagoo loo qoray inay si buuxda u shaqeeyaan. Tusaale, goluhu wuxu dhimi karaa saacadaha shaqada ee maalintii, hase ahaatee, wuxu dalban karaa qof kasta oo shaqaale ahi inuu shaqada xaadir ku ahaado isla waqti isku mid ah. Taasi waxay keenaysaa kormeerid dhab ah/habboon waxaanay hubaal uga dhigaysaa inay joogi doonto cid wax u qabata dadka xilliyada la sii sheegay ee maalintii. Taladan oo kale inta badan waa la arkaa "ARRINKAAS MA SAMAYN KARNO"! Sababtee?

## Xubinta Degaanku markuu yahay Hay'ad Dhise

- Waxaad la timaaddaa habab lagu xiisageliyo/lagaga shaqaysiiyo shaqaalaha. Haddii koox hawleed oo ka tirsan waax ay isku muujiyaan inay lacag u kaydin karaaan xukuumadda hoose oo ay hagaajin karaaan tayada adeegga ay fidinayaan, waa inaad jeclaysato inaad siiso abaalmarin lacag caddaan ah oo lagu siinayo dadaal koodaas. Tababarku waa arrin kale oo dardar gelisa shaqaalaha, gaar ahaan haddii qofka shaqaalaha ah la siiyo fursad lagu tababaro shaqada, tababar kaasina uu ku lug leeyahay jid dallacaad leh oo taariikh mustaqbalka ah uu helayo.

## Tababarka Hoggaanka la soo doorto

Toosinta dhibaatooyinka muddada dheer taagnaa ee ka dhigay dawladdiina hoose mid ku jirta hay'adaha kuwa ugu wax soo saarka yar leh bulshada ma ahaanayso wax hawl yar. Sii wadidda wixii aad hore u soo qabanaysay ee shaqayn waayeyna manoqonayso jawaabta. Waxaanu rumaysannahay maalka ugu weyn ee loo baahan yahay in lagu dhiso kartida iyo awoodda – waxqabad ee hay'adda dawladda hoose inuu yahay fekerka wax abuura oo ay la yimaaddaan golaha iyo shaqaalaha soo saaridda habab cusub oo lagu hirgeliyo ama dhammaystiro barnaamijyada iyo adeegyada, adigoo isticmaalaya

**Qormo**

khayraadka ama maalka aad gacanta ku hayso.
Marmarka qaar sida keliya ee loo xallin karo dhibaato in dowra taagnayd waa iyadoo dib loo sharxo, adigoo sidii hore si ka duwan u eegaya, debeddana uga saaraya xuduudo aad adigu jeexatay oo ah waaya aragnimadii hore; dabadeedna adigo dhibaatadii madaxeeda hoos keenaya minjihiina kor keenaaaya; ugu dambayntiina falaya waxaadan ka fekerayn (kuwaasoo noqon karaa adigoo ka fekera waxyaalo aanad weligaa hore uga fakirin)

## Milicsi

Dowladdiina hoose miyey ku jirtaa laba daran mid dowro oo la moodo inaanay xal lahayn sida ta kor ku tilmaaman? Haddii ay sidaas tahay, waxaad daqiiqado yar ku qaadataa maskax ku rog-rogidda habab golihiinu uu u xallin karo dhibaatada si ka duwan tii hore. Mar haddii layliganu aanu wax dhibaato ah ku gelinayn ha ka noq – noqon ama ka maagin inaad ka fekerto fekrado "waalan". Marar badan, ayey fekradaha noocaas ahi keenaan jawaabo caqli weyn ku fadhiya.

?______________________________

?______________________________

?______________________________

?______________________________

?______________________________

?______________________________

?______________________________

?______________________________

**Xubinta Degaanku markuu yahay Hay'ad Dhise**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

**Qormo**

## Qiimaynta Hay'adda

Dedaal kasta oo la xidhiidha hay'ad dhisid qaabaysani wuxuu si weyn uga faa'iidaystaa qiimaynta wax soo saarka, macaamiisha iyo raalli ka noqoshada wax-soo-saarka ee macaamiisha. Qiimaynta aynu maskaxda ku haynaa waxay eegaysaa wax soo saarka hay'adda oo dhan oo ay ku jiraan kuwa ay isticmaashay hay'addu (sida bakhaarada ama kaydka, xafiisyada shaqaalaha, xisaabaadka). Waxaa kale oo ay qiimayntu abbaartaa/aqoonsataa qof waliba wuxuu hawl qabanaayo iyo in cid kale ay qaban karto/ay tahay inay qabato hawl ka sii wanaagsan marka la gudanayo shaqa kastaba ama adeeg walba. Qiimaynta hay'adeed ee caqli galka ah ee sidan oo kale ah, haddii loo gudagalo si dhab ah, waxaa laga heli karaaa fekrado badan oo ku lug leh siyaabaha loo xoojin karo hay'adda iyo in dib looga fekero sida ay tahay inay dowladdiina hoose wax u qabato markay u adeegayso cod-bixiyayaasheeda.

Qiimayntani waa in aanay ahaan mid kharash badan ku kacda, in kastoo shaqaalaha ay waqti ka qaadayso, golaha iyo shaqaaluhuna ay ballan qaadyo samaynayaan. Waa hawl ay suurtagelin karaaan la-taliyayaal laga soo kaxaysan karo machadka tababarka ee dawladdiina hoose iyadoo la adeegsanayo nidaamay soo dejisay UNCHS (Habitat). Nuqul buugga talabixinta qiimaynta ah waxaa laga heli karaaa iyadoo codsi loo qorto qaybta tababarka, UNCHS (Habitat). S.B. 30030, Nairobi, Kenya.

## Daldaloolooyinka fulinta

Qiimaynta hay'addu waa inay siisaa golaha warbixin ku saabsan meelaha bannaan ee ka muuqda dhammaystirka/ fulinta ee u dhaxaysa siyaasadahooda iyo waxyaalaha xaqiiqda ah ee dhaca markay shaqaaluhu gacanta ku dhigaan. Inta badan waxaa jira meelo bannaan oo ka muuqda fulinta, sababaha keenaana way kala duwan yihiin. Sida la rumaysan yahay waxaan ahayn inaanay had iyo jeer shaqaaluhu wax dembi ah ku lahayn arrintaas. Halkan waxaanu ku soo arurinay weydiimo adiga iyo xubnaha kale ee deegaanku aad isweydiinaysaan haddii meelahaas bannaani ay soo baxaan. Waxaa taasna ka sii wanaagsan idinkoo is weydiiya su'aalahan intaydaan gaarin heerka dhammaystirka, idinkoo weli ku guda jira qaban qaabo siyaasadeed.

**Xubinta Degaanku markuu yahay Hay'ad Dhise**

- x Shaqaaluhu fursad ma u heleen ka faalootan ku lug leh siyaasad la soo jeediyey intaan la qaadan, ra'yina aan laga dhiiban wixii walaac ah ee laga qabo dhammaystirka ammurtaas?
- x Shaqaaluhu ma fahamsan yihiin waxaad rabto inay qabtaan?
- x Wax ballanqaad ah miyey galeen inay dhamaystiraan siyaasadda? Haddii ay maya tahay, Sabab?

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

- x Goluhu ma diyaariyey maalgelintii lagama mar-maanka ahayd ee lagu dhammaystiri lahaa siyaasadda?
- x Siyaasaddu ma tahay mid run ah kuna dhammaan karta waqtiga loo qabtay?
- x Cod bixiyayaashaadu ma aqbali doonaan oo ma taageeri doonaan siyaasadda iyo cawaaqibka ay la timaaddo?

## Qormo

Iyadoo aynu ka hadlaynay siyaabaha loo xoojin karo hay'adda dowladda hoose, su'aalahani waxay si is le'eg u khuseeyaan dhibaatooyinka xiriirka ka dhaxeeya golaha iyo shaqaalaha. Nasiibwanaag, u helitaanka jawaabo qaar badan oo su'aalahaas kor ku ku xusan ah ayaa kallifaya hay'adda kharash yar, waxaanay ku kordhinayaan faa'iidooyin door ah. Faa'iidooynkaas waxa ka mid ah:

- Shaqaalaha oo helaya fursad lagala tashado inta lagu gudajiro hawsha go'aan gaadhista;
- Shaqaalaha oo ka kororsanaya inay si wacan u fahmaan waxa goluhu uu doonayo in la qabto;
- U-bislaynta shaqaalaha inay hawsha dhammaystirka ka qayb qaataan;
- Keenidda heer aaminaad iyo qaddarin oo dhexmara golaha iyo shaqaalaha, arrintaasoo dhalinaysa ogolaansho waxyaalo aan la isku raacsanayn iyo wada xaajood daacad laga yahay;
- Tijaabinta aqbalka cod-bixiyayaasha iyadoo la hubinayo in lagu socon doono talo-galka siyaasadda.

> ***Haddii aad beerto doog ma goosatid bariis.***
>
> ***- Maah-maah reer Malaysiya ah***

## Xalliibnaanta iyo Xisaabinta

**Xubinta Golaha Deegaanku markuu yahay Hay'ad Dhise**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

Waxaanu ku soo qaadnay mawduucyada ka dhexmuuqashada iyo xisaabinta buugag hagitaan oo hore inoo soo maray waxaanu rabnaa inaanu wax ka sheegno mar kale. Waxay yihiin tayada maamulka kuwaas oo sii kordhaya muhimmadda maalin kasta. Odayaasha qaarkood ayaa diiddan fikradda in xubnahaas firfircooni ay lug ku leeyihiin xukunka, mar haddii iyaga loo soo doortay xafiis dadweyne. Ha yeeshee, xubno gole deegaan oo tiro badan ayaa ogaaday/ ay u caddaatay in tayooyinkaas qof ahaaneed la abaabuli karo si ay uga caawiyaan golayaasha curinta iyo dhammaystirka barnaamijya dooda si ka firfircoon kana karti badan sidii hore. Markaynu erayo kale ku tilmaano, gudo ka aragga iyo xisaab celintu waxay yihiin istiraatiijiyo siyaasadeed iyo maamul oo loo isticmaalo si ay wax u qabsoomaan. Su'aalaha aanu kor ku soo caddaynay ee loogu talagalay in meelaha bannaan ee ka muuqda dhammaystirka hawsha lagu xakameeyo halkooda. Waxa kale oo loo isticmaali karaa sal laga soo bilaabayo dhisme gudaha laga arki ogyahay xisaabtiisuna ay dhammaystiran tahay oo ah dowladda hoose.

**Qormo**

**Waxa loo yaqaan MT**

Hay'adaha gaarka iyo kuwa dadweynaha/ dowladaha adduunka dhammaantood waxay ahmiyad dheeraad ah siiyeen siday u hagaajin lahaayeen maamulka khayraadkooda/ maalkooda. Wakaalado iyo shirkado badan ayaa gunnadu ay uga dhigan tahay culeyska soo kordhaya oo kaga imanaya xagga tartamayaashooda/ kuwa ka barbar ganacsanaya. Dhinaca waaxda dowladda culaysku maaha mid kaga imaanaya wakaaladaha dowladda ee la tartamaya ee waa ku ka soo gaaraya ilaha dhaqaale oo yaraanaya iyo dalab codbixiye oo soo kordhaya kuna saabsan barnaamijyo iyo adeegyo wacan. Si ay ugu tartamaan adduunkan adkaaday, maamulayaasha waaxaha dadweynaha iyo kuwa gaarka ahba waxay ku dhegeen/ laabta gashadeen istiraatiijiyad hawleed oo loo yaqaan maaraynta tayada (MT).

Waxaa jira dhinacyo ay leedahay MT oo ka taageerta golayaasha iyo shaqaalaha dhismaha hay'ado sidii hore ka karti badan, istraatiijiyo kaa taakulayn kara daboolidda baahiyaha codbixiyeyaashaada. Kuwaas waxa ka mid ah:

- Codbixiyeyaashaada oo aad ka dhigto sida macaamiisha iyo isticmaalyaasha, kuwaasoo ikhtiyaar leh;
- Ka fiirsasho dheeraad ah oo aad u yeelato tayada wax soosaarka iyo adeegyada aad u fidinayso dadweynaha;
- Ka-hor-tegidda dhibaatooyinka halkii aad ka maarayn lahayd xilli dambe oo ay kharash door ah ku tegayaan hay'adda iyo muwaadiniinta;
- Wadaagga mas'uuliyadaha go'aan sameynta iyo dhibaato xalinta ee hay'adda gebi ahaanteed;
- Xoojinta shaqada kooxda, iyadoo ay ku jiraan in ka badan kuwa ku lug leh qaybta shaqada cayiman ee ka walaacsan dhibaatada xilligaas taagan; iyo
- Ka go'naan/ ballan qaad ah hagaajin joogta ah oo la xiriira siday u shaqayso dowladda hoose iyo habka waddaniyiinteeda loogu adeego.

.

**Xubinta Golaha Deegaanku markuu yahay Hay'ad Dhise**

Istiraatiijiyadahan waxa laga yaabaa inay u qabaan odayaal badan oo deegaan ah iyo saraakiil sareba xikmado gaboobay oo hiddo salka ku haya. Laakiin runtu waxay tahay, may helin jidkii loo marayey hawlaha maalineed ee dowladaha hoose inta badan. Bal aynu ka fiirino dhinaca aragtida kaalintaada adigoo ah alkume.

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

1. **Yool-higsi:** Hay'ad Dhisiddu markay tahay istiraatiijiyo shaqaynaysa, way adag tahay hirgelinteedu haddii aanay dowladda hoose haysan hawl guddi oo qeexan iyo hagitaan mustaqbalka la xiriira. Waxaad doontid ugu yeer qorshe istraatiijiyadeed ama waxaad doonto. Waxaa muhiim ah waxa weeye qodobaynta tiro hadafyo ah iyo ulajeeddooyin loogu talagalo bulshada, kuwaas oo b) ay isku raacsan yihiin xubnaha golaha iyo kooxda maamulka dowladda hoose t) ay taageersan yihiin taxane ballaaran oo ra'yiga dadweynaha ah; iyo j) in loo diyaariyo khariidada wadada go'aan samaynta waqtiga xaadirka iyo mustaqbalkaba khusaysa. Hadafyada iyo ulajeeddooyinkani waxay intii hore ka xoog roonaanayaan haddii ay yihiin qaar ka wacyi gashan xagga codbixiyayaasha tilmaamayana istiraatiijiyo, balan ku gelaya, inay harumarinayaan tayada barnaamijyada dadweynaha iyo adeegyada (wacyigelinta

**Qormo**

tayada ee macaamiisha loogu talagalay ee hore aanu u soo sheegnay.

2. **Maaraynta Togan.** Dowladaha hoose intooda badan waxay ku qasban yihiin inay "isku dayaan soo gaaridda" iyagoo xooggooda iyo xoolahooda inta badan saaraya dhibaatooyinka muddada dheer taagnaa, oo marmarka qaarkood ay abuureen golayaashii hore. Bedelida hannaankan maamul ee soo noq-noqonaya ma ahaanayo wax sahlan. Ha yeeshee, suurtagelintu way badnaanaysaa haddii goluhu uu leeyahay qorshe istiraatijiyadeed inuu: b) hago shaxaynta iyo isticmaalka hantida yar; t) qabto diraasado suuragalnimo lagu sameeyo mashaariicda cusub si loo hubiyo inay u hirgeliyaan sidii loogu talagaly iyo j) hanti miisaaniyadeed oo ku filan socodsiinta hawsha iyo kharash bixinta maalgelinaha hadda taagan.

3. **Go'aan-qaadashada idman**. Arrinka ugu weyn ee weli ku qufulan hay'ado dhoor ah wuxuu yahay ku wareejinta awoodda iyo mas'uuliyadda heerar ku habboon oo ah go'aan samayn iyo dhibaato xalin. Wax ka niyad jab weyni ma jiraan markaad booqato xafiiska karraaniga magaalada oo aad ku aragtid galal/faylal dhooban miiskiisa qoraalka iyo armaajadiisa. Dhammaantiin arrinkaas waad wada aragteen. Waxa ku jira galalkaas waraaqo/dokumenti aad u fara badan, dadkaasoo si hawlyar loogu riixay (oo garab ku yimid) jagadaas ka tirsan silsiladda amarka leh (ee uu kuu caddayn karo liiska dheer ee saxeexyada ah ee ku yaal jeldiga (the cover) kuwaas oo siday u dhan yihiin isugu xiran "xariga gaduudan" (hoosta iska og) ee sugaya usoo jeesadka/ tixgelinta madaxa maamulka, xagga hoose ee hay'addana derejo ahaan waxa ka buuxa madax waaxeed oo karti leh iyo xirfadlayaal sare kuwaasoo jidka lagu qallajiyey, maxaa wacay, waxaanay lahayn awoodii go'aaminta.

Habkan xilliyadii fogaa ee tegey lagu dhaqmi jirey, ee sii ololinaya/ sii shidaya baahida gumaysiga ee ah in laga koontaroolo go'aamada oo dhan xagga sare, wuxu dhaliyaa xaalad weyn oo xumo ku noqda hay'adda. Waxaa u weheliya abuuridda carqaladda shaqo xumada ee qiimaha weyn kallifaysa maalinba maalinta ka dambaysa. Dusha ka kontarooliddaasi waxay sababtaa mijaxaabinta xiisagelinta shaqaalaha iyo balamaha ay galaan inay xilka si wacan uga soo baxaan. Maskaxda kama heli karno dhaqan ka muhiimsan kan higsadkaagu uu yahay inaad shaqada ka fariisato xilli hore oo aad xaqaagii hesho, kaasoo aad ku heli karto dadaal ku salaysan hagitaan gole iyo hay'ad dhisid

## Xubinta Golaha Deegaanku markuu yahay Hay'ad Dhise

> Ubbo weyn oo xagga hoose ka daloosha lama buuxin karo.
> – Maahmaah Afrikaan ah

## Tababarka Hoggaanka la soo doorto

**Qormo** **Milicsi**

Joogso daqiiqad oo maskaxda ka sawir xafiiska sarkaalka madaxa maamulka. Ma jiraan galal is-dul saran oo yaalla miiskiisa amase miiskeeda, miisaska iyo armaajooyinka oo u eg inay meelahaas muddo yiilleen? Haddii ay sidaas tahay, waxa kale oo aad fiirin/deyi kartaa waxay ku dambayn doonaan faylalkaas isdul rasaysani. Waxaad xariiqdaa qoraallo yar – yar oo ku lug leh sidaad uga la xaajoon lahayd mowduucan sarkaalka madaxa maamulka hab aad is leedahay wuxuu keeni karaa natiijooyin sii socda muddo.

**Xubinta**

**Golaha Degaanku markuu yahay Hay'ad Dhise**

1. **Harudhigidda hawl kooxeedka**. Waxaa si dhawaansha leh ugu xiran cid kale u xilsaaridda go'aan samaynta iyo dhibaato xalinta ilaa iyo heerka ugu caqligalsan ee socodsiinta hawshu, waa harumarka kooxaha shaqada kuwaasoo daacad u ah fikirka in dhibaatooyinka intooda badan la xalin karo haddi kooxo karti badan oo waaya – argnimo leh la siiyo madax bannaani (awood iyo xil) iyo adduun lagama maarmaan ah oo uu wax ku meel-mariyo. Libinta Maareynta Tayo (MT) inteeda badan ee hore loo soo sheegay, waxa sabab looga dhigay ku dhaqanka kooxaha shaqo ee is – maamula ee leh awoodda iyo hantida ay hawlaha ku hirgelinayaan, markay la kulmaan dhibaato u baahan in la xaliyo.

2. .

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

**Qormo**

4. Waxaa si dhawaansha leh ugu xiran cid kale u xilsaaridda go'aan samaynta iyo dhibaato xalinta ilaa iyo heerka ugu caqligalsan ee socodsiinta hawshu, waa harumarka kooxaha shaqada kuwaasoo daacad u ah fikirka in dhibaatooyinka intooda badan la xalin karo haddii kooxo karti badan oo waaya – argnimo leh la siiyo madax bannaani (awood iyo xil) iyo hanti lagama maarmaan ah oo uu wax ku meel-mariyo. Libinta Maareynta Tayo (MT) inteeda badan ee hore loo soo sheegay, waxaa sabab looga dhigay ku dhaqanka kooxaha shaqo ee is – maamula ee leh awoodda iyo hantida ay hawlaha ku hirgelinayaan, markay la kulmaan dhibaato u baahan in la xalillo.

5. **Tababar, tababar, tababar:** Hay'ad dhiska micnaheedu waa tababar. In kastoo ay jiraan waxyaalo badan oo loo qaban karo hay'ad xoogaynta ee aan u baahnayn tababar. Inta badan harumarka shaqaalaha waxaa lagala mid dhigaa u diridda shaqaalaha joogtada ah tababarka muddada dheer ee lagu qabto machadka tababarka ee waddaniga ah. Waxase nasiibdarro ah, in tababarka noocan ahi kharash dhoor ah ayuu ku kacaa. Nasiib wanaag, kuwa ugu hawlkarsan uguna jaban (xagga kharashka) tababarada waxa laga heli karaa shaqada lafteeda. Harumarinta shaqaalaha ee shaqada gudaheeda ah iyagoo xilalkooda gudanaya waxay u baahan tahay kormeerayaal iyaga laftooda lagu soo tababaray xirfadaha noocaas ah sida carbinta iyo hawlkooxeed, kuna balamalay inay ku kaalmeeyaan dad kale siday wax u baran lahaayeen. Sidaas awgeed, furaha tababarka hawsha gudaheeda ah oo guul dhalisa waxay ku jirtaa doorashada ka fiirsiga leh, harumarinta, iyo taageerada joogtada ah ee laga kororsado koox xul ah (kaadir) oo laga soo xulay hormoodka kormeera yaasha ee u leh awood inay go'aammo gaaraan marka loo eego/ u qalma hawlaha loo xil-saaray.

6. **Caqaladaha qaab – dhismeed ee waxqabadka hay'adeed.** Weligaa ma isweydiisay/ ka fakirtay maxaa ugu wacan hay'adda dowladda hoose sida ay u habaysan tahay? Waxaa laga yaabaa in aadan is weydiin. Inteena badani si fudud ayeynu isaga qaadanaa/aqbalnaa qaab –dhismeedka hay'adaha sidii oo ay yihiin wax muqadas ah oo aan la taaban karin. Weliba intaas waxa dheer, dowlada hoose intooda badan waxa dhidibada loo taagay lana habeeyey tobanaan sano ka hor markii uu u babac – dhigidda maamuliddu tiro iyo tayo ahanba ay ku kala duwanaayeen. Hay'ad dhisidda firfircooni waxay u baahan tahay in min waqti ilaa waqti dib loo dhugto hay'adda si looga warhelo in sida qaabkeeda loo dhisay ee loo habeeyey ay daboolayso baahiyaha xilligaas taagan ee golaha, shaqaalaha iyo codbixiyayaasha. Haddii aanay sidaas ahayn is beddel ku samee! yimaaddaan dowladaha

**Xubinta**

**Golaha Degaanku markuu yahay Hay'ad Dhise**

3.

## Dhiiri-gelinta hay'ad dhisidda

Wasaaradda Qorshaynta Siyaasadda iyo Fulinta ee xukuumadda Sirilanka, iyadoo la kaashanaysa Wasaarad Goboleedyada, waxay qabataa tartan sannadeed khuseeya harudhigidda xilgudashada dowladda hoose oo loogu talagalay inuu dhiirrigeliyo waxqabad muuqda oo ay dowladaha hoose ee dalkaasi

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

## Qormo

Waxaanu jecelnahay inaanu tilmaano wax yar oo ah heerka la rabo in la gaaro ee Wasaaraddu ay u qabatay tartankan oo ay rumaysan yihiin inuu muhiim u yahay arrimaha la doonayo in loo soo jeediyo dareenka/ fiirada dowladda hoose. Waxa kale oo ay tilmaamayaan qaar ka mid ah xubnaha mihiimka ah ee lagu tixgelinayo barnaamij kasta oo hay'ad dhisidda khuseeya ee goluhu uu gudan karo.
Halkan waxa ku muujisan wax yar oo ah hawlaha iyo heerka laga doonayo in la gaaro ee wasaaraddu ay u isticmaasho qiimaynta waxqabadka barnaajiyada tartan ee dowladooda hoose;

- x Diyaarinta Barnaamijka horudhigidda waxqabadka marka la raacayo hagitaanada Wasaaradda;
- x Abuurida shirar-kooxeedyada maaraynta, kuwaas oo la gaarsiinayo tiradooda 12 shir sannadkiiba;
- x Barnaamijka xiriirka dadweynaha oo ay ku jirto maalinta dadweynaha si loo la kulmo canshuur-bixiyayaasha iyo soosaaridda warbixin sannadeedka warku ku dhan yahay;
- x Hannaan xafiis oo karti iyo hufnaanba leh, kaas oo ay ku jiraan dejinta qaab habboon oo galalka (filing) ku lug leh iyo astaamo lagu dhejiyo dhismayaasha dadweynaha si loogu taageero muwaadiniinta socodsiinta ganacsiga;
- x Hagaajin joogto ah oo lagu sameeyo dhismayaasha dowladda iyo warbixin saddex bilood ah oo ku saabsan xaaladda ay joogto/ ku jirto hantida (dhismayaasha iyo qalabka) oo dhan;
- x Digtoonaan iyo ka-hor-tegid caafimaad oo ay ku jiraan sahaminta iyo diiwaangelinta goobaha ay kaneecado ka dhalato;
- x Dejinta qaabab maamul oo maaliyadeed, taas oo ay ku jiraan heerar la rabo in laga gaaro noocyo dhowr ah oo ku lug leh dakhliga iyo kharashka; iyo
- x Heerar kale oo badan oo la isticmaali karo oo dalka Sirilanka lagaga cabbiro heerar cayiman oo waxqabadka dowladda hoose la xiriira.

### Xubinta Golaha Degaanku markuu yahay Hay'ad Dhise

Dowladaha Hoose ee Sirilaanka waxay mid waliba ta kale kula tartantaa dhinaca tirada dadka ku nool iyadoo lagu helayo abaal marino iyo aqoonsi xilgudashada ah. Waa hab aad u fiican in lagu dardar/xiisageliyo gole iyo shaqaalaba si ay hore ugu dhigaan waxqabadkooda. Waxaa kale oo aqoon kororsi ka hela madaxda iyo saraakiisha ku lug leh heerarka sare ee waxqabad ee ay tahay suuragal inay guul ka gaaraan socodsiinta hawsha dowladooda hoose. Hawsha noocan oo kale ah dowladaha hoose ee kuwan ka ballaaran ayaa ku dhaqmi kara isla hay'adooda gudaheeda, iyagoo uga bilaabi kara tartan dhexmara waaxaha kala duwan uguna dhiirri-gelin kara horumarinta hawsha.

.

## Gebogebo

### Tababarka Hoggaanka la soo doorto

Markii aad u tartamaysay doorshada golaha, waxa laga yaabaa inaanad aad uga fakirin kaalintaada khabiirnimo. Iyadoo sidaas ay thay, haddana guusha aad ku gaaray inaad noqoto hoggaan la soo doortay waxay si weyn ugu xirnaanysaa tayada waxqabad ee hay'adda dowladda hoose iyo shaqaalaha. Markaad arrintaas ogtahay, kaalinta hay'ad dhisaha waa inaan loo qaadan/ loo arag wax hawlyar.

.

**Qormo**

Dadaalka adiga iyo saaxiibadaada golaha ku jira aad gelisaan dhismaha waxqabad idinka ayaa u aayaya siyaasad dejiyayaal ahaan iyo codbixiyayaashiina, kuwaasoo dowladda hoose uga fadhiya barnaamijyo taya leh iyo adeegyadaba..

**Qoddobo Muhiim ah**

- Hay'ad – dhisiddu way ka ballaaran tahay hagaajinta xiriirka u dhexeeya golaha iyo shaqaalaha,inkastoo ay tahay meel wacan oo wax laga bilaabo.
- Caddaynta/ qeexidda kaalintu waa u xubin muhiim ah dhinaca xiriirka golaha iyo shaqaalaha xuduudaha u dhaxeeya doorarkaasna waxa laga yaabaa inay u baahdaan ka wada xaajood min waqti ilaa waqti ah si ay xiriiradaasi u wacnaadaan, qaar miro dhaliyana u noqdaan.
- Iyadoo ay tahay odayada deegaanku inaanay dhexgelin qiimaynta shaqaalaha (waa hawl u taalla kormeerayaasha), waxaad u xilsaaran tahay inaad hubisid in uu jiro qaab qiimayn waxqabad oo u shaqaynayey sidii loo qorsheeyey.
- Waxaa ka reebban arrintaas oo keliya waxaa weeye goluhu inuu qiimeeyo wax-qabadka sarkaalka madaxa fulinta iyo haddii cid lagu daro karraaniga golaha.
- Qiimaynta waxqabadka hay'addu iyadu waa hubaal inay tahay mus'uuliyadda golaha, waana in loo galo sidii dadaal wada jir ah iyadoo lala kaashanayo shaqaalaha sare.
- Qabashada qiimayn hay'adeed oo ku saabsan qalabka wax soosaarka iyo macaamiisha, iyadoo la isticmaalayo qaabka UNCHS (Habitat), waxay u noqon doontaa aasaas adag qorsheynta harumarka hay'adda.
- Goldaloolooyinka ka muuqda fulinta had iyo jeer ma aha waxay eed ku leeyihiin shaqaaluhu.
- Daahfurnaanta iyo isla xisaabtanku waxay muhiim u yihiin samaynta abaabul hufan oo karti leh.
- Dowladaha Hoose ee hawlkarka ah waxaa haga guddiyo wata hadafyo iyo ujeeddooyin cad oo qeexan oo u noqda khariidada jidka mustaqbalka soo socda.
- Abuurida waxay u baahan tahay in la qaybiyo go'aan-qaadashada iyo maareynta xiisadaha lana gaarsiiyo ilaa heerarka ugu hooseeya ee waxqabad ee hay'adda.
- Shaqa kooxeedku wuxuu aad muhiim ugu yahay hay'ad dhisidda iyo waxqabadka hay'adeed ee harumarsan.
- Hormoodka Kormeerayaasha ee hawlkarka ah iyo tababarka shaqada dusheeda lagu qabto waxay xubno muhiim ah u yihiin waxqabad waaritaan leh.
- Marka arrinku yahay dib u habayn lagu samaynayo hannaanka dowladda hoose, xasuusnow in qaabku uu raacayo hawlgalka, oo aanu raacayn caadada/ dhaqankii hore.

**Xubinta**

**Golaha Degaanku markuu yahay Hay'ad Dhise**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

## Raad-raac

Xarunta Qaramada Midoobay ee Deegmeynta Aadanaha (Habitat), "Buug-gacmeedka Qiimaynta Hay'adeed ee Ururrada Deegmeynta Aadanaha" (Nairobi,Kenya,UNCHS,1992)

)

**Xubinta Golaha**

**Degaanku markuu yahay Hay'ad Dhise**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

# Qeybta 2aad

**AQOON-iS- WEYDAARSI**

# Xubinta Golaha Degaanku markuu yahay Hay’ad Dhise

**Xubinta**
**Golaha**
**Degaanku**
**markuu yahay**
**Hay’ad Dhise**

**Tababarka**
**Hoggaanka**
**la soo doorto**

**Aqoon is waydaarsi**

**Xubinta Golaha Degaanku markuu yahay Hay'ad Dhise**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

**Aqoon is waydaarsi**

# Muuqaal Guud

## Ujeeddo:

Abuurida waxaa lagu sheegi karaa dadaal kasta oo loo galo horudhigidda waxqabadka hay'adeed. Abuur ahaan, odayga Deegaanku wuxu ku ka go'an hawlo ka dhigaya hay'adda uu shaqada ka hayo mid ka wacan tii hore. Imtixaanka hor yaalla madaxa la soo doortay marka uu u shaqaynayo dowladda hoose, waxay tahay in uu fahmo waxa loo baahan yahay in uu qabto ee hore loogu marinayo waxqabadka hay'adeed iyo inuu ku shaqeeyo qaabka keeni kara is- beddellada lagama maarmaanka ah.

Aqoon isweydaarsigani wuxuu xoogga saarayaa kaalinta odayga deegaanku uu ku leeyahay meelmarinta isbeddelada wax lagu hagaajinayo ee waxqabadka hay'adeed, iyadoo awoodda la saarayo sida loo gelayo ee xilkasnimada leh si wax looga beddelo xaaladaha daciifinaya hay'adda iyo sida loo wanaajinayo xiriirka u dhaxeeya golaha iyo shaqaalaha, kuwaasoo lagu heli karo qiimaynta waxqabad iyo ka wada xaajood kaalineed/door.

## Arrimaha uu ka kooban yahay (Contents)

Tilmaan kooban oo la xiriira hawsha barashada ayaa hoos ku muujisan iyadoo ay la socoto qiyaas ah waqtiga loo baahan yahay. Haddaad doonto inaad qaabka wax ka beddesho, wax aad ka dhinto ama ku kordhiso murti aad adigu leedahay, xorbaad tahay ee ku dhaqaaq.

### 11.1 Layli diyaar garow ah: Maxay dhibaatadu tahay?

Ka qayb galayaashu way xasuusan yihiin waxa kaaga caraysiiya ee khuseeya waxqabadka hay'adaha ay ka shaqeeyaan ee ha ka wada hadlaan sababaha dhaliya iyo dawadooda/xalalkooda (45 daqiiqo).

### 11.2 Bandhigga tababaraha

Bandhigid kooban oo ku saabsan sida loogu dhaqmo gorgortanka door si loo xaliyo iska hor imaadyada adag ee golaha iyo shaqaaalaha is afgaran waayada; nidaamyo lagu hagaajiyo waxqabadka golaha iyo shaqaalaha, kuwaasoo ay ku jiraan habab lagu qiimeeyo sarkaalka madaxa fulinta; iyo sida loogu dhaqmo IMT si hore loogu dhigo karti badnaanta iyo hawlkarnimada guud ee dhammaystirka barnaamijyada dowladaha hoose. (30 daqiiqo)

**Aqoon is waydaarsi**

**11.3 Dhacdooyinka halista leh ee waxqabadka hay'adeed.**

Ka qaybgalayaashu waxay akhriyayaan shan dhacdo oo tilmaamaya goldaloolooyinka hay'adda, waxaana ay goosanayaan/go'aan ka gaarayaan doorarka ku habboon ee ay leeyihiin xubnaha goluhu inay wax kaga qabtaan
(60 daqiiqo).

**11. 4 Kiis barasho: wax ka beddelidda qaabka xafiiska shaqaalaha ee Croptown.**

Ka qayqgalayaashu waxay akhiryaayaan xalad ku lug leh xubin gole oo isku deyaya inuu xoog ku marsiiyo isbeddel lagu sameeyo waax ka mid ah dowladda hoose, waxaanay ka wada hadlayaan dhaqanka xubinta golaha ka midka ah (60-75 daqiiqo)

**11.5 Layli: Gorgortanka door ee golaha/shaqaalaha**

Ka qaybgalayaashu, iyagoo ciyaaraya doorarka shaqaalaha iyo xubnaha golaha, waxay jilayaan wuxu mid kastaaba ka kale kaga caroodo/dhirfo, waxa si wada jir ah u sheegayaan isbeddelada ay filayaan inay arkaan, waxaanay ka wada hadlayaan waxka beddelka doorarka. (120 – 150 daqiiqo)

**11.6 Dood hagan: qiimaynta shaqaalaha.**

Ka qabygalaayshu waxay ka wada hadlayaan kana jawaabayaan weydiimaha la xiriira waxqabadka shaqaalaha maamulkooda (75 daqiiqo)

**11.7 Carbis la xiriira xirfad-beddelka**

Ka qaybgalayaashu waxay soo iftiin-celinayaan/xasuusanayaan waxyaalihii ay soo barteen, waxaana ay samaynayaan ballan qaadyo ah inay ku dhaqmaan marka uu dhammaado aqoon-isweydaarsigu.

**11.4 .**

**Xubinta Golaha Degaanku markuu yahay Hay'ad Dhise**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

**Aqoon is waydaarsi**

## 11.1 Layli diyaar garow ah: Dhibaatadu maxay tahay?

### Ujeeddo

Carbiskan waxa loogu talagalay in laga dhex abuuro wada hadal ka qayb galaaysha la xiriira caragelinta hay'adda iyo baahida loo qabo in fiiro xoog ah la saaaro sababaha keena carooyinkaas.

### Hordhac

U kala saar ka-qayb-galaayaasha kooxo yaryar oo midkiba ay ka kooban tahay shan ilaa toddoba ka qaybgale. Waxaad weydiisataa ka qaybgale walba inuu ku qoro kaar ah 3 x 5 inch qabytiisa sare wax gaar ah oo laga dhirfi karo oo khuseeya habka ay u shaqayso dowaladooda hoose. Caddayntaasi/qoraalkaasi waa inuu tilmaamo waxa ay ku kacdo dowladda hoose oo ay tahay in aanay ku kicin ama waxaana ay dowladda hoose qaban oo ay tahay inay qabato. Markay ka qayb galaayshu bogaan arrinkan, waxaad ka codsataa inay hadda isticmaalaan qaybtii hoose ee kaarka iyagoo qoraya jawaabta su'aasha soo socota.

> Haddii aad wax ka qaban lahayd dhirifkan,
> muxuu noqon lahaa waxqabadkaasi

Markay ka qaybgalayaashu ay jawaabahooda ku qoraan kaararka, waxaad weydiisataa inay ku dhejiyaan kaararkooda gidaarada qolka kuna qaataan daqiiqado yar inay ku wareegaan gidaarada iyagoo akhriyaya waxyaalaha ku qoran kaararka ka qabygalayaasha, markay akhriyaana inay dib ugu noqdaan meelihii ay fadhiyeen.

**Xubinta Golaha Degaanku markuu yahay Hay'ad Dhise**

Markay ka qayb galayaashu fariistaan, u sheeg in qaar badan oo arrimaha laga dhirfo ah oo ay soo qabteen ka qayb galayaashu ay runtii yihiin astaamo qoto dheer oo aasaas/bilow ka sarreeya kuna lug leh dhibaatooyinka hay'adda. Weydii ka qaybgalayaasha inay ka fakiraan waxa ka dambeeya ka caraysiinta hay'adahooda; si loo aqoonsado/ogaado waxa dhalinaya. Weydii sababta ay u ictiqaadsan yihiin inay muhiim tahay in la raadiyo lana daydayo habab lagu tirtiro saababa keena dhibaatooyinka hay'adda halkii laga daweyn lahaa astaamaha cudurka oo keliya

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

## Bandhigga Tababaraha

### Waqtiga loo baahan yahay: 30 daqiiqo

Bandhigiddan waxaa looga dan leeyahay inay siiso ka qaybgalayaasha fikrado iyo aragtiyo laga qabo doorka hay'ad dhisaha iyo aasaaska aragtiyeed ee ay u isticmaali karaan carbisyada qofka iyo kooxda ee ku jira aqoon isweydaarsigan.

### Ujeeddo:

Bandhiggan waxaa looga gol leeyahay in ka-qaybgalayaasha loogu deeqo fikrado la xiriira kaalinta Abuuraha iyo fikrado aasaasiya oo ay u adeegsadaan layliyada qofeed iyo kuwa kooxeed ba

### Harbaaca

Diyaari bandhigga oo ku salaysan warku saabsan doorka hay'ad_dhisaha oo laga soo qaadanayo qoraalka faahfaahsan ee aynu hore usoo marnay. Si gaar ah, faaladaada xooggeeda u saar sida loogu dhaqmo ka wada xaajoodka door si loo xaliyo iska hor imaadyada adag iyo is af garan waayada golaha iyo shaqaalaha; nidaamyo lagu hagaajinayo waxqabadka golaha iyo shaqaalaha, kuwaasoo ay ka mid yihiin siyaalo lagu qiimeeyo sarkaalka madaxa fulinta; iyo sida loogu dhaqmayo IMT iyadoo  lagu horumarinayo karti badnaanta iyo firfircoonida ee gebi ahaan hirgelinta barnaamijyada dowladda hoose.

Warka xaddilan ee ku yaalla kaararka qoraalka kooban ayaan kaa caawin kara helintaanka/sugidda warka si hannaan leh oo jadwalka aanad uga bixin. Weydii su'aalo min waqti ilaa waqti intaad bandhigidda ku guda jirto, taasoo u noqon karta hubsiimo ka qaybgalayaasha dhinaca fahamka dareenkooduna soo jeedin karto. Bandhigidda waxaad ku sii balballaarisaa waxyaalaha kaaba aragga (sida sawirada, filimka iwm), kuwaasoo ay ku jiraan waraaqaha khafiifka ah ee jaraa'idka loo isticmaalo ee wax lagu daabaco iyo qalabka waxaa gudaha ugu jira gidaarka sawirkooda ka soo saaraya (overhead projector) qalabkasoo u noqonaya kaabe dheeraad ah xagga fahamka

**Aqoon is waydaarsi**

## 11.3 Dhacdooyinka halista ku ah waxqabadka hay'adeed

### Waqtiga loo baahan yahay:60 (daqiiqo)

### Ujeeddo:

Layligan waxa loola jeedaa ka qaybgalayaashu inay aqoonsadaan doorka habboon ee xubnaha goluhu ay ka qaataan sidii loo dabooli lahaa gol-daloolooyinka waxqabadka hay'adda.

### Habraaca

Qaybi nuqullo ah warka ku cad bogga kan xiga ee ku lug leh shan gol-daloolo hay'adeed oo caan ah (dhacdooyinka halista ah), kuwaasoo laga yaabo in la arkay ama la soo gaarsiiyey warkooda xubin golaha ka mid ah. Ka codso ka qayb galayaasha inay akhriyaan shanta dhacdo.
Markay ka qaybgalayaashu bogtaan akhriska dhacdooyinka, u qaybi dhowr kooxood oo yar-yar. Koox kasta ka codso inay ka jawaabaan su'aalahan hoos ku muujisan:
:

***Muxuu yahay doorka habboon ee ay leeyihiin xubnaha Goluhu ee khuseeya horudhigidda waxqabadka hay'adda?***

**Xubinta Golaha Degaanku markuu yahay Hay'ad Dhise**

Waxaad siisaa kooxaha yar-yar qiyaastii 30 daqiiqo si ay uga wada hadlaan dhacdooyinka ugana jawaabaan su'aasha dhacdo walba ku saabsan. Soddon 30 daqiiqo kadib, dib isugu yeer kooxihii, mid kastana ka codso warbixin. Wada-hadal

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

Aqoon is waydaarsi

## SHAN DHACDO OO HALIS KU AH WAXQABADKA HAY'ADEED

**Dhacdada 1aad**

Booqasho dhawaanahan logu tagay xafiiska madaxa maamulka ayaad waxaad aragtay in miiska shaqada iyo miiska kale ay ka buuxaan faylal. Xaaladdu wax yar ayey iska beddeshay bilo ka dib booqashaadi hore ee xafiiska maamulka. Sida muuqata, wax aan weynayn ayaa laga qabtay yaraynta culayska shaqada.

**Dhacdada 2aad**

Waxay dacwadi kaaga timid qof xaafadaha kuu dhow deggan. Intii ay isku dayeysay waaxda caafimaadka magaaladu inay u nadiifiso boosaneerada musqulaha ah, waxaa loo sheegay in shaqadaasi qaadanayso muddo saddex todobaad ah, sababtuna ay tahay ogolaansho dhowr ah oo looga baahan yahay xafiisyada maammulka ee kala duwan.

**Dhacdada 3aad**

Xubin Golaha Degaanka ka tirsan oo cusub waayo-aragnimo shaqana u leh xisaabaadka ayaa ku warbixisay in xafiiska khasnajiga uusan lahayn wakiilasho shaqo (delegation). Si xubin gole deegaan dhowaan la doortay, waxay codsatay in loo sheego tallaabada laga qaadi karo xaaladdan liidata ee xil-qaybinta ah.

**Dhacdada 4aad**

Dhowr qof oo booqasho ku tegay Dowladda Hoose ayaa faallo ku bixiyay marar kala duwan in ay ka waayeen shaqaalaha xafiisyadoodii wakhtiga shaqada la galo, iyo waqtiga laga rawaxo.

**Dhacdada 5aad**

Qof ganacsade ah ayaa Golaha Degaanka hor yimid isagoo ku dacwoonaya inuu dadaallo aan kala go'lahayn sameeyay si uu lacagtiisii u helo taas oo ahayd qalab lagu dhisay laami (waddo) (asphalt)oo laga soo iibsaday bilo dhowr ah ka hor, ha yeeshee, ilaa hadda aan la siin.

**Aqoon is waydaarsi**

## 11.4 Diraasad Xaaladeed: WAX-KA-BEDELKA QAABKA XAFIISKA SHAQAALAHA EE CROPTOWN

### Waqtiga loo baahan yahay: 60 – 75 daqiiqo

### Ujeeddo

Daraasadda xaaladdan waxa looga danleeyahay in lagu bandhigo waxa dhici kara marka xubin golaha deegaanka ka mid ah oo dhowaan la soo doortay uu u isticmaalo awoodiisa and awoodeeda iyo waaya-aragnimada xirfadeed si uu u qasbo is beddelid shaqaale amardiida sameeya ee dawladda hoose.

### Hab-raaca

Waxaad guddoonsiisaa ka qaybgale kasta nuqul xaalad loo yaqaan "wax ka beddelka qaabka xafiiska shaqaalaha ee Croptown". Waxaad weydiisaa ka qaybgalayaasha inay akhriyaan xaaladda. Marka ay ka qeybgalayaashu akhriyaan xaaladaan, u qaybi kooxo yar-yar oo afar ama shan ah. Koox walba waxaad ka codsataa inay ka jawaabaan su'aalaha saddexda ah ee ka dambeeya xaaladda oo ay kuu keenaan jawaabaha qiyaastii 20 daqiiqo, kadib, Markay kooxaha yar-yari kuu yimaaddaan, koox kasta waxaad weydiisaa siday wax u qabatay ama siday uga jawaabi lahayd mid kasta oo ka mid ah saddexda su'aalood. Waxaad dhiirrigelisaa wada xaajood guud iyo is barbar dhig ah qodobada fekradaha.

**Xubinta Golaha Degaanku markuu yahay Hay'ad Dhise**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

**Aqoon is waydaarsi**

# WAX-KA-BEDDELKA QAABKA XAFIISKA SHAQAALAHA EE CROPTOWN

## Xaaladda

Croptown waa xarun weyn oo suuq-geyn iyo qaybinta u ah 50,000 oo qof, waxayna ka mid tahay gobolada ugu dhul beereedka badan dalka. Ilaa beri dhoweyd, dowladda hoose sida Golaha Deegaanka magaalada Croptown waxay u shaqeyn jireen sida wakiillo ay leedahay dawladda waddankaasi, taasoo ay lahaayeen awood aan sidaas u sii weynayn. Dhaqan ahaan, siyaasadaha waxa lagu soo samayn jirey dowladda dhexe waxaana ku hawlgeli jirtey xukuumadda hoose, Sanado badan oo masuuliyad ah, musuq-maasuq dowlad nimo, dhaqaalo xumo soo wajahay dadka ku degen magaalinka yar yar iyo tuulooyinka, dareen caro oo ka yimid dadweynaha ayaa si xoog leh ugu kacay dawladda dhexe waxaanu keenay in dawladdii ay ku dhaqaaqdo arrin cusub oo harumar leh lagana meelmariyey magaalo madaxda. In ka yar lix bilood, ayaa xeerar badan oo loogu yeero kuwa is-maamulka ayaa golaha cusubi ansixiyay, kuwaasoo watay awoodo wax gudbinya oo is-maamul hoose ah oo lagaga dhaqmo dalka dhammaantii. Waa cusub ayaa u baryey Croptown, ha yeeshee, isbeddelkii wuxuu noqday mid ka fog xaqiiqda kana marnayn dhibaato sida lagu bandhigi doono xaaladda.

Peter Malla waxaa dhowaan loo doortay in uu ka mid noqdo xubnaha gollaha magaalada Croptown muddo labo sano ah.

Waa ganacsade iyo madaxweyne ku xigeenka u qaalisan shaqaalaha shirkadda ka shaqysa arimaha beerah, waxa uuna yahay sarkaal markii ugu horraysay loo soo doortay xafiiska. Malla xubin gole ahaan, waxa laga soo doortay degmo leh ganacsiyo yaryar oo badan. Waxay u arkeen taageerayaashiisu inuu yahay murashax/tartame isbeddel fiican keeni kara, ballan qaad kiisuna wuxuu ahaa inuu u howlgalo karti badnaan iyo dhaqaale badan in laga helo dowladda hoose ee Croptown.

**Xubinta Golaha Deegaanku markuu yahay Hay'ad Dhise**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

Ganacsigiisa gaarka ah marka uu wado, Oday Malla waa maareeye dabeecad adag, wuxuu rabaa in wax walba deg-deg iyo karti badnaan loo qabto. Shaqaalihiisa iyo shurkihiisa ama gacan yare yaashiisu waxay u hayaan tixgelin/xaqdhawr halka ay uga hayn lahaayeen kalgacal. Sababaha loogu soo doortay golaha Croptown waxaa ugu waaweynaa karti badnaantiisa ganacsi ee ma ahayn xirfadaha uu dadka kula shaqaysto. Tan iyo xilligii la soo doortay, Oday Malla, mar wax kabadan, ayaa afkiisa laga maqlay sida tan "weli iskamaaan dhigin nin siyaasi ah, waxaan u dhaafaa arrimaha siyaasadda duqa

**Aqoon is waydaarsi**

Oday Malla dhowrkii bilood ee Gollaha deegaanka ugu horeeyey waxay aheeyd qaar aad wax ugu iftiiminaya/ugu kordhinaya. Iyadoo ay ugu wacan tahay khibradiisa ganacsi, Malla wuxuu Markiiba gooni ula soo baxay qaabka xafiiska shaqaalaha ee dawladda hoose ee Croptown inuu aad ugu fiiro yeesho. Wuxuu xiisa aad ah u hayey qaabka mushaaraadka iyo gunno- maalineedka, xubintaas oo uu islahaa aqoontiisa iyo khibradiisa ayaa si gaar ah ugu bisleeyey inuu qiimeeyo. Wax yar ka dib wuxu ka helay mushahaadkii waxyaabo badan oo aan isla eekayn/cadaaladna ku salaysnayn. Wuxuu ogaaday dhibaatada inay tahay nidaamka lagu soo shaqaynayey sannado badan, in aan dib loo eegin si uu u daboolo baahiyaha dowladda taas oo laga filanayo adeegyo cusub oo badan iyo masuuliyad.

Murugsanaanta dhibaatadan darteed, Malla wuxu go'aansaday in qiimayn dibadda ah lagu sameeyo nidaamka shaqaalaha xafiiska oo loo xilsaaro shirkad maamul. Sidaas awgeed, wuxu shaqada qortay xubin shaqaale ah oo aqoon leh, kaasoo ka tirsanaa machadka maamulka dawladda oo qayb ka ah Jaamacad meel dhow ku taalla, si uu cilmi baaris u sameeyo u galo. Cilmi baaris laba bilood qaadatay ka dib markii uu hawlo hanti dhowrka ku lug leh oo ballaaran galay, xubintii shaqaaluhu wuxuu ku taliyey dib u habbayn guud oo lagu sameeyo jagooyinka iyo mushaharka oo sal looga dhigo qaabka xil-gudashada ee hawlaha la xiriira. Oday Malla wuxu nuquladii warbixinta machadka u diray Golaha Deegaanka isagoo soo jeedinaya in la qaato oo lagu dhaqmo. Kadib markii wadahadal kooban goluhu ka yeeshay warbixintii iyagoo shir caadi ah fadhiya, goluhu wuxu ku ansixyey oo ku ogolaaday arrinkaas codad ah afar uu ka dhan yahay mid 4/1.

Isla maalintii xigtay, Oday Malla nuquladii warbixinta wuxu u gudbiyey xoghayihii Dowladda Hoose, taasoo uu u raaciyey waraaq ku amraysay inuu u qaybiyo maamulaha xafiiska shaqaalaha iyo madaxda waaxaha oo dhan faraysana in lagu dhaqmo qaabka cusub, sida suurtogalka ah ee ugu dhakhsaha badan. Wuxu caddeeyey inuu qaabkan cusubi la iman doono isbeddelo loo baahan yahay oo lagu sameeyo hannaanka loo warbixiyo, kala saarida mushahaarooyinka, iyo sharaxa/ ka jawaabidda barnaamijka.

**Xubinta Golaha Deegaanku markuu yahay Hay'ad Dhise**

shaqaalihii dawlada hoose way ka war heleen in cilmi baaris la sameeyey, hasayeeshee, may ogaan waxay ku saabsanayd ilaa maanta waxa galay dareen caro iyo cabsi isugu jira. Kuwii ku fadhiyey jagooyin wax laga bedelayo dhinaca masuuliyadda amase mushaharka way ka xumaadeen. Waxay u barteen arrimuhu sidii ay ahaayeen ama loo qaban jirey waxa ayna ka sii naxeen hubsiimo la'aanta shuruudaha cusub. Qaarkood waxay ka cawdeen inaan qorshaha cusub ee mushaharooyinku wax tixgelin ah siin xagga mudnaanta iyo sannado badan oo adeeg daacadnimo ah loo hayey taasoo keenina karta cadaalad darro cusub.

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

Isagoo shir kula jira Karraaniga Magaalada maalmo yar ka dib, Oday Malla waxa loo sheegay dhaqan gelinta qaabkii cusbaa inay dhibaato soo gaartay. Qaar ka mid ah kuwii ugu hadalada cad-caddaa madaxda waaxaha ayaa waxay gaareen heerar ay yiraahdaan qaabka cusubi wuxu keenayaa dhibaatooyin halkii uu xalka ka noqon lahaa. Malla argagax ayuu qaaday.

**Aqoon is waydaarsi**

Wuxu fahmi waayey sababta habraac si aad u taxadir leh looga baaraandegay oo looga soo shaqeeyey si loogu dabakho hawlaha dawladda hoose hawlkarnimo iyo dhaqaale soo kordha iyo sixidda cadaalad darrada ku jirta xilsaaridda shaqooyinka iyo mushaaraadka, inay la kulanto caabbin /ka horimaad noocaas ah.

## Su'aalo

1. Ka wada hadla habboonida dedaaladda Oday Malla uu ku dhaqaaqay si uu hore ugu dhigo qaabka xafiiska shaqaalaha.

2. Muxuu ahaa malaha ku dhaqaajiye Oday Malla dadaaladiisa ahaa inuu hagaajiyo qaabka?
3. Maxay ahaayeen is moodsiisyadii khuseeyey doorarka golaha iyo shaqaalaha markii hore loo dhigayey hay'adda ee ka tarjumay ama ugu wacnaa ka hor imaadkii shaqaalaha ee ku wajahnaa dedaaladii odayga?
4. Maxay kale ayuu qaban lahaa Oday Malla haddii uu rabo inuu gaaro wax hagaajinta loo baahan yahay?

**Xubinta Golaha Deegaanku markuu yahay Hay'ad Dhise**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

**Aqoon is waydaarsi**

## 11.5 layli:- GORGORTANKA KAALINEED EE GOLAHA SHAQAALAHA

**Wakhtiga loo baahan yahay: 120 daqiiqo**

## Ujeeddo:

Layligani wuxuu siiyaa ka qaybgalayaasha khibrad iyagoo isticmaalaya istiraatiijiyad gorgortan oo hawl kar ah, taasoo ay ku xallinayaan iska hor imaadyada amase waxyaabaha aan caddayn ee muranka dhaliya ee u dhexeeya odayaasha golaha iyo xubnaha shaqaalaha.

## Habraaca

Waxaad ku bilowdaa layliga inaad xasuusiso ka qaybgalayaasha in dadka ka shaqeeya hay'adaha ee leh doorar kala duwan oo ay ciyaaraan inta badan waxay is arkaan iyagoo iska horimaad ku jira. Inkastoo waxaan la hurayn ay ku tahay nolosha hay'adda (intay hay'addu jirto), haddana iska horimaadku waa inaanu noqon mid wax dumiya. istaraatiijiyado badan ayaa jira oo kaalmaynaya kooxaha isku tiirsan si ay uga heshiiyaan ammuuraha ay isku hayaan, si ay awooddooda uga leexin lahaayeen hawsha ka adkaanta qof uguna jihayn lahaayeen shaqo hay'adeed oo wax soo saarta.

Waxaad sii wadataa tilmaanta ka wada xaajoodka door adigoo u kala saaraya hawl ah lix tiir markaad xalilayso iska horimaadka doorka. Tiirarkaasi waxay ku muujisan yihiin bogga kan xiga, kuwaas oo la badin karo si loo siiyo ka qaybgalayaasha. U sharax inaad u qaybin doonto ka qaybgalayaasha laba kooxood, koox ka mid ahi ay ciyaari doonto doorka odayaasha golaha halka ay ta kalena geli doonto kaalinta shaqaalaha dawladda hoose. Labada kooxood waxa lagu curin karaa iyadoo ka qayb galayaasha la kala siiyo tirooyin ka bilaabma kow oo xidhiidh ah ( 1,2,3,4,5,…….), adigoo ka codsanaya inuu qof kastaaba xasuusto tirada la siiyey. Ka qayb galayaasha ay ku soo beegmeen tirooyinka laba u qaybsama waxay matali doonaan xubnaha golaha layligan dartii, ka qayb galayaasha ay ku soo hagaagaan tirooyinka aan waxbaba u qaybsamin waxay ahaan doonaan shaqaalihii.

**Xubinta Golaha Degaanku markuu yahay Hay'ad Dhise**

Ka qayb galayaashu markay fahmaan kooxaha ay ka tirtsan yihiin kaddib oo ay akhristaan xaashiyaha gacanta loo geliyey, wax yar oo waqti ah u ogolow si ay su'aalo iska weydiiyaan hawsha iyo doorarka ay ka ciyaari doonaan. Markay ka qayb galayaashu diyaar noqdaan, koox walba waxaad siisaa xirmo ah waraaqaha khafiifka ah ee joornaalada lagu daabaco, qalin maarkar (Markers), iyo meel buuq yar oo ay ku shaqeeyaan iyagoo aad labada kooxood kala fogeysay.

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

**Aqoon is waydaarsi**

Waxaad u soo jeedisaa koox kastaaba inay iska doorato/magacawdo warbixiye Hadalka qora iyo waqti-ilaaliye. Waxaad bilowdaa hawsha gorgortanka. Waqtigaagu ha u qaybsamo labada kooxood intay gooni-goonida u shaqaysanayaan. Waqtigaagaas waxaad isticmaashaa inaad ka jawaabtid su'aalaha ku lug leh hawsha waxaanad ku adkaysaa ka qayb galayaasha inay si dhakhso leh ugu tallaabsadaan hawlaha loo dhiibay.

Markay ka qayb galayaashu dhameeyaan hawsha ka wada xaajoodka kaalineed ee lixda tiir, waxaad u horseedaa ka faalootan/ dhaliilaha aad ku samayso layliga, adigoo su'aalaha soo socda u isticmaalaya hagitaan iyo wada hadal:

1. Hay'adiinu ma leedahay nidaam habaysan oo ku saabsan wada xaajoodka iska hor imaadka ee u dhexeeya golaha iyo shaqaalaha?
   (Waxaad weydiisaa ka qayb galayaasha yiraahda way leedahay hay'adayadu inay tilmaan ka bixiyaan qaabka ay u isticmaalaan iyo goorta).

2. Maxaad ku tilmaami kartaa inay yihiin dhinacyada nidaamkaas ugu xooggan iyo kuwa ugu liita, istiraatiijiyadda dowrka gorgortan ee u dhaxaysa golaha iyo shaqaale?

3. Maxaa la yeeli karaa ama la qaban karaa marka la rabo in lagu dhaqan geliyo nidaam gorgortan kan oo kale ah hay'addiina?
4.

**Xubinta Golaha Degaanku markuu yahay Hay'ad Dhise**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

**Aqoon is waydaarsi**

# GORGORTAN KAALINEED: HABRAAC LIX DHUDOOD AH

**Tallaabada Koowaad**

Waxaad ku taxdaa waraaq ama laba nooca khafiifka ah ee joornaalada lagu daabaco arrimaha kooxda kale ay ku kacdo ee kaa caraysiiya. Tusaale, haddii aad tihiin koox xubno gole deegaan ah, liiskaaga waxaad gelisaa waxyaabaha kaa caraysiiya ee aad ku aragtay shaqaalaha, sida hoos ku muujisan:

- Lagama helo xafiisyadooda markaanu soo wacno ama aanu nimaadno anagoo war raadinayna;
- Dhif iyo naadir ayey nooga soo warbixiyaan halka ay marayaan/inta la soo gaarsiiyey mashaariicda muhiimka ah;
- Marwalba waqti dheer ayey ku qaadataa si ay hawlaha u gutaan, oo aanay ahayn inay ku qaadato.

Dhinaca kale haddii aynu jalleecno, haddii aad tihiin koox shaqaale ah, waxaad ku darsan kartaa liiskaaga waxyaalaha kaa caraysiiya ee ay ku kacaan xubnaha golaha deegaanku, sida hoos ku cad:

- Waxay go'aamada gaaraan iyagoo aan wax war ah amase talo aan na weydiin;
- Waxay jebiyaan ama ku xad gudbaan "silsiladda amarka" iyagoo u dhiibaya xilalka shaqaalaha heerarka hoose ah oo aan marka hore la talagelin madaxda qofka shaqaalaha ah; Waxay noo dhiibaan shaqada mashaariicda iyagoon ka fekerin/ka fiirsanin waxaanu hawlo gacanta ku hayno.

**Tallaabada Labaad**

Qiyaastii 30 daqiiqo ka dib, waxaad la kulantaa kooxda kale. Waxaad u dirtaa afhayeenka kooxda inuu ku dhejiyo derbiga waraaqaha jilicsan ee kooxda, waxaanad soo bandhigtaa liiska kooxda ee ay ku qoran yihiin waxyaabaha lagaga carooday kooxda kale, iyadoo arrin walba laga bilaabayo hadalladan, "waxyaabaha na caro geliyaa ee khuseeya golaha ama shaqaalaha waxa weeye……….." Warbixintaadu waa inaanay qaadan waqti ka badan shan daqiiqo. Inta warbixinta lagu jiro waa inaan la gelin wax wadahadal ah. Marka aad fahantid warbixintaada, dhegayso afhayeenka kooxda kale marka uu warbixinta sheegayo

**Xubinta Golaha Degaanku markuu yahay Hay'ad Dhise**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

**Aqoon is waydaarsi**

**Tallaabada Seddexaad**

Markay dhamaadaan warbixinaha kooxuhu, ku noqo goobta kulanka si aad u diyaariso liis codsiyo ah oo aad ka doonayso kooxda kale. Codsi kastaaba waa inuu ku lug leeyahay dhaqannada carada dhalin kara mid ahaan oo aad kala soo baxdo liiskaaga. Tusaale, haddii kooxdaadu ay ciyaarayso doorka odayaasha deegaanka, waxaad ka codsan kartaa kooxda matalaysa doorka shaqaalaha inay ka sameeyaan warbixino joogto ah halka ay marayaan dhammaan mashaariicda loo dhiibay shaqaalaha ee goluhu u xilsaaray.

Codsiganu wuxuu khusaynayaa welwelka ay shaqaaluhu mar-mar iyo dhif uga warbixiyaan golaha xaaladda xilligaas taagan ee mashaariicda muhiimka ah.

Haddii kooxdaadu ay ciyaarayso doorka shaqaalaha, waxaad ka codsan kartaa kooxda matalaysa doorka xubnaha golaha, in odayaasha raba in hawlo loo dhiibo shaqaalaha ay marka hore wixii la qaban lahaa si cad isula gartaan madaxda shaqaalahaas. Codsigani wuxu daweynayaa welwelka shaqaalaha ee ahaa odayaashu waxay isku deyayaan inay ku xadgudbaan silsiladdii amarka. Sidii hore ba loo yeelay, liisaska codsiga waxa lagu diyaarinayaa waraaqihii khafiifka ahaa ee waaweyn. Diyaarinta codsiyadu waa inay qaadato qiyaastii 30 daqiiqo.

**Xubinta Golaha Degaanku markuu yahay Hay'ad Dhise**

**Tallaabada Afaraad**

Muddo 30 daqiiqo ah gudahood, waxaad la kulantaa kooxda kale. Haddii aad ka tirsan tahay kooxda golaha, waxaad ku dhejisaa gidaarka waraaqihiinii jilicsanaa, soona bandhiga liiskiina codsiyada. Haddii aad tahay kooxda shaqaalaha, dhegayso kooxda kale markay soo jeedinayaan liiska codsiyada. Kaddibna sida kale u dhig nidaamka/ kala geddi. U dir xubin ka mid ah kooxdaada inuu qoro erayada codsi kasta oo aanay waxba ka dhinnayn ee kooxdaada ku socda. tallaabadani waa inay qaadato 10 daqiiqo.

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

**Tallaabada Shanaad**

Markay labada kooxoodba warbixintooda dhameeyaan (waa inay qaadato qiyaastii 10 daqiiqo) waxaad ku noqotaa goobtaadii shirka si aad uga jawaabto codsi walba oo ku socday kooxdaada kana yimid kooxda kale. Waxaa haystaa qiyaas ahaan 30 daqiiqo inaad kaga jawaabtid codsi kasta oo ay sameeyeen kooxda kale. Waxaad ku bilowdaa jawaab kasta oo aad leedahay hababka soo socda mid ahaan:

1. Waynu u samayn karnaa (wixii la codsaday) si fudud ……… (sii wad adigoo sharxaaya waxa aad diyaarisay in aad samayso si aad codsiga u fuliso).
2. Waxaan rajaynaynaa in aan samayno (waxa la codsaday) haddii aad idina geestiina rajaynaysaa in aad samaysaan……. (dhammaystir adigoo sharxaya waxa aad rabto dhinacooda inaad ka heshid kooxda kale).
3. Ma qaban karno arrinkaas (wixii la codsaday) sababtoo ah ( sharax sababta waxa aad u samaynayso waxa kooxda kale aysan rabin in aad samayso)

**Aqoon is waydaarsi**

**Tallaabda Lixaad**

Marka liiskiina jawaabaha ee codsiyada kooxdiina loo soo gudbiyey ee ka yimid kooxda kale ay dhamaadaan, ku biir kooxda kale. Waxaad bandhigtaa liiska kooxdiina ee jawaabuhu ku qoran yihiin, adigoo isticmaalaya waraaqaha waaweyn ee gidaarka ku dheggan, waxaanad diyaar u ahaataa inaad falanqayso sababaynta jawaab kasta. Kooxda kalena waxay samayn doonaan sidaas oo kale.

# Dood Hagan: QIIMAYNTA SHAQAALAHA

## Ujeeddo:

Layligani waa inuu horumariyo wadaagga khibradaha ka qaybgalayaasha marka la qiimaynayo waxqabadka ku lug leh shaqaalahooda maamulka.

## Habraaca

Ku martiqaad ka qayb galayaashu inay si tamar leh uga qayb qaataan wada hadal ku saabsan siyaabo kala duwan oo loo qiimeeyo shaqaalaha maamulka ee dawladda hoose.
Ka dooro xunbo dhowr ah si ay u noqdaan hoggaamiyayaal wada hadal. Sii hoggaamiye kastaba oo lala soo baxay su'aalaha hoos ku yaalla mid ahaan si uu uga dhigto mowduuciisa/ceeda ay ka hadli doonto.

1. Xubintee ka tirsan dawladdiina hoose ayaa goluhu uu qiimeeyaa? Miyey jiraan dad kale oo ay tahay in goluhu qiimeeyo? kuwee ayey yihiin?
2. Imisa jeer ayaa qiimaynataas la qabtaa? Imisa jeer ayey tahay in la qabto? Mudada u dhaxaysaa ma inay kala duwanaataa oo shaqaalaha qaar ba waqti uu u kala dhex-dhexeeyo? Dabeecadda/dhaqanka qofka shaqaalaha ah, wanaag ama xumaan, miyey tahay inay wax ku kordhiso inta goor ee ay qiimayntu dhacayso?
3. Hannaankee ayuu goluhu ku dhaqmaa markuu samaynayo waxqabadka shaqaalaha la qiimaynayo? Haddii lagu oran lahaa soo diyaari heerka lagu qiyaaso waxqabadka shaqaalaha oo joogto noqda, maxaad ka dhigi lahayd? (ku qor waraaqaha waaweyn).
4. Sidee ayaad ugu qanacsanayd natiijooyinka qiimayno aad ka qayb qaadatay xubin gole deegaan ahaan? Maxay ahaayeen dhinacyada ka sareeyey caadiga? Maxaa caddeeya ama tilmaan u noqda guusha? Maxay ahaayeen dhinacyada gaari waayey caadiga(Average)? Maxaa caddaynaya/ka warramaya natiijooyinka niyadjabka leh? Maxaa loo qaban karaa sidan si ka duwan doorka dambe?

Waxaad ka codsataa hoggaamiyayaasha wada hadalka in ay hore u soo dhaqaaqaan iyagoo tixgelinaya nidaamka/sida ay u soo kala horeeyeen.waxaad soo jeedisaa inay is weydiiyaan su'aalaha loo dhiibay dhammaantood. Waxa kale oo aad soo jeedisaa inay is weydiiyaan wax allaale wixii su'aalo dheeraad ah ay raacinayaan ee ay is leeyihiin waa la qaadan karaa oo qodob wax ku kordhinaya ama dhiirigelinaya fikrado kale. Isticmaal su'aalaha goorma? Halkee? Maxay? Sidee? Waayo? iyo Kee? Marka aad damacsan tahay soo gelinta su'aalo dheeraad ah waa hab wacan oo wax lagu dhaqaajin karo. Intaadan bilaabin, waxaad xasuusisaa hoggaamiyayaasha wada hadalka inay u qorshe yeelaan waqtigooda (qiyaastii 15 daqiiqo mowduuciiba). Waxaad u gashaa halkii waqti-ilaaliyaha afarta wada hadal ba

**Aqoon is waydaarsi**

> ***Waxaan wakhti xilliyada ka mid ah lahaa lix nin oo ii adeega, waxay i bareen aqoon leeyahay; magacyadoodu waxay kala ahaayeen halkee, goorma, waayo, maxay iyo sidee iyo kee.***
>
> ***- Rudyard Kipling***

**Xubinta Golaha Deegaanku markuu yahay Hay'ad Dhise**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

**Aqoon is waydaarsi**

# LAYLIGA XIRFAD GUDBINTA

## Ujeeddo:

Layligan waxa loola jeedaa in laga caawiyo/taageero ka qayb galayaashu inay gudbiyaan/ku dabbaqaan aqoonta ay ka korodhsadeen aqoon-is-weydaarsiga hawlahooda rasmiga ah madax la soo doortay ahaan waxa xooga amase dareenka la saarayaa waa kor u qaadidda filashada, ku hawlanaanta qorshayn run ah, iyo ballanqaadyada qofnimo. Shaqada inteeda badan waxa loo qabanayaa qof-qof oo ay weheliyaan waxaan badnayn oo ay shakhsiyaadku dood-wadaag yeelanayaan.

Waxa guud ahaan la isku raacsan yahay danta laga leeyahay tababarka inay tahay in la wacnaysiiyo habka ay dadku wax u qabtaan, adigoo tusaya hab ka wacan.
Siday xaqiiqadu tahay, guusha khibradda tababarka waxa laga qiyaasi karaa koboca qofnimo intuu leegyahay iyo isbeddelka dhaca/la arko inta tababarka lagu gudo jiro iyo marka tababarku dhamaadaba.

Tababarku mar-mar iyo dhif ayuu saamayn ku yeeshaa ka qayb galayaasha aqoon is weydaarsiga, taasoo tababarayaashu ay rajeeyaan inuu ku yeesho, gaar ahaan marka ay ka sii maqanaadaan saacado yar oo qura. Riyaaqa/farxadda weyn ee ay la yimaaddaan goobta aqoon is weydaarsigu si dhakhso leh ayey u shiiqdaa markii qofkii tababarnaa uu ku soo laabto dhaqamadii hore ee shaqada iyo xintanka jilayaasha/rafiiqyada shaqada ee aan ka qayb qaadan waaya-aragnimada tababarka.

Dhinaca kale haddii la jalleeco, la qabsiga u nuglaanta barashada iyo is beddelka ay isku arkaan marka uu soo dhamaado aqoon is weydaarsigu waxay ka caawin karaan inay ka gudbaan nacaybkii hore ugu jiray iyo jawigii shaqada ee ay waagii hore ku jireen. Tababaruhu wuxu ka teegeeri karaa tababar galayaasha inay ka guuraan si ay guuli ku jirto caalamkii (duniddii) aqoon kororsiga oo ay u guuraan dunida waxqabadka, taasoo uu ka siin karo layli qorshe oo fudud. Waqtiga lagu qaatay in lagu dhiirigeliyo gudbinta aqoon kororsigu waxay noqon kartaa faraqa u dhexeeya bandhigid kooban oo ku saabsan fikrado xiiso leh iyo waayo-aragnimo isbeddel nololeed kuu horseedda.

**Xubinta Golaha Degaanku markuu yahay Hay'ad Dhise**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

**Aqoon is waydaarsi**

## Habraaca

Waxaad ku qaadataa ugu yaraan saacad barkeed soo xiritaanka aqoon is weydaarsiga, adigoo xoogga/dareenka saaraya inay ka qayb galayaashu u soo jeediyaan barashooyinka muhiimka ah kuna dhiirrigeli inay sii wadaan ku tijaabinta waxyaalaha ay soo barteen hawlaha golahooda. Ku bilow inaad siiso ka qayb galayaasha qiyaas ahaan 15 daqiiqo in si qof-qof ah/qof waliba goonidii uga shaqeeyo weydiino la buuxinayo meelaha bannaan oo ku lug leh gudbinta barashada sahlan.

Markay ka qayb galayaashu dhameeyaan buuxinta foomka weydiimaha, waxaad weydiisataa inay kala qayb galaan kooxda laba arrimood amase saddex ay damacsan yihiin inay u qabtaan si ka duwan sidii hore xagga doorarka golahooda dhismaha-hay'adeed ahaan si loo afjaro aqoon is weydaarsiga.

**Xubinta Golaha Deegaanku markuu yahay Hay'ad Dhise**

**Tababarka Hoggaanka la soo doorto**

Waxaad ku qaadataa daqiiqado yar inaad soo xasuusatid kaalinta hay'ad-dhisaha, fikradaha cusub ee aad kala kulantay aqoon is weydaarsigan, iyo sida ay kala yihiin. Kaddib, meelaha bannaan ee hoos ka muuqda, waxaad ku qortaa weedh ama laba adigoo tilmaamaya waxa ku xiiso geliyey ee aad uga baratay naftaada mudadii aqoon is weydaarsigu socday.

______________________________________________________________

______________________________________________________________

______________________________________________________________

Adigoo ku salaynaya wixii aad naftaada ka kororsatay iyo suurtogal nimada badanaa inay wax is beddelaan ee lagu soo jeediyey aqoon is weydaarsigan, maxay yihiin labada amase saddexda arrimood ee aad ku talojirto inaad sidii hore si aan ahayn u qabato dhinaca doorka golahaaga deegaan hay'ad-dhise ahaan?

______________________________________________________________

______________________________________________________________

______________________________________________________________

Ugu dambayntii, maxay yihiin carqaladaha naftaada amase jawiga shaqadaada ee aad filayso inay kaa hor yimaaddaan, marka aad ku jirto dedaallo la xidhiidha dhaqan-gelinta isbeddeladaas? Maxaad qaban doontaa si aad meesha uga qaaddo amase aad u dhintid carqaladahaas?

______________________________________________________________

| Carqaladda | Tallaabada aad meesha kaga qaadayso carqaladda |
|---|---|
| 1.____________________ | 1.____________________ |
| 2.____________________ | 2.____________________ |
| 3.____________________ | 3.____________________ |

***Haddii aad wax baran karto, wax waad qaban kartaa***

**XARUNTA QARAMADA MIDOOBAY EE DEEGAAMADA AADAMAHA ( HABITAT)**

**S.BOOSTA 300030,NAIROBI,KENYA**
**Tilifoon: (254-2) 621234,Telex:22996 UNHAB KE,Cable:UNHABITAT FACSIMILE: (254-2) 624266/7 (Central Office),624262(ADM),623263/4(TCD),624265(RDD).**

| EREY BIXIN | |
|---|---|
| **ENGLISH** | **SOOMAALI** |
| 1. Accountability | **- Xisaabtan** |
| | **- Xilkaa Saaran yahay** |
| 2. Action plan | **- Qorshe hawleed** |
| | **- Qorshe Wax-qabad** |
| 3. Active Listening | **- Dhegaysi feejigan** |
| | **- Dhegaysi Darban** |
| | **- Dhegaysi Mug leh** |
| 4. Alternative | **- Kala Doorasho** |
| | **- Wax bedeli kara wax kale** |
| 5. Application | **- Arji** |
| | **- Codsi** |
| | **- Adeegsi** |
| 6. Assessment | **- Qiyaasid** |
| | **- Qiimayn** |
| 7. Authority | **- Awood Maamul** |
| | **- Mas'uuliyiin** |
| 8. Awareness | **- Wacyi-galin** |
| | **- Ka war qab** |
| 9. Basic Education | **- Wax-barasho Asaasi ah.** |
| 10. Beneficiary | **- Dan ku Qabe** |
| | **- Ka faa'iidayste** |
| 11. Capacity Building | **- Kobcin wax Qabad** |
| | **- Awood dhisid** |
| 12. Case Study | **- Daraasad Xaaladeed**<br>**-Kiis Barasho** |
| 13. Check list | **- Liis Hubineed** |
| 14. Civic | **- Madani** |
| | **- La xiriira magaalo** |
| | **- Muwaadin** |
| 15. Collaboration | **- Gacan siin** |
| | **- Wada shaqayn** |
| | **- Is Caawimid** |
| 16. Committee | **- Guddi** |
| 17. Communicator | **- Xariiriye** |
| | **- Isgaarsiiye** |
| 18. Community | **- Bulsho** |
| | **- Jaaliyad** |
| 19. Community Development | **- Horumarin Bulsho** |
| | **- Horumarin Jaaliyadeed** |
| 20. Concepts | **- Figrado** |

| | |
|---|---|
| | **- Aragtiyo** |
| 21. Conceptual Hat Rack | **- Fikrada Metalaada Xilaalka**<br>**- Koofiyadaha Matalaya Dowrarka** |
| 22. Conflict | **- Khilaaf** |
| | **- Iska af-garan waa** |
| 23. Consensus | **- Rayi la isku raacay** |
| | **- wadar wad-ogal** |
| 24. Consequently | **- Natiijo** |
| | **- Cawaaqib** |
| 25. Constituency | **- Dagaan Doorasho** |
| 26. Co-operation | **- Iskaashi** |
| | **- Wada shaqayn** |
| 27. Council | **- Gole** |
| 28. Councillor | **- Xil-dhibaan Degaan** |
| | **- Xubin ka tirsan Golaha deegaanka** |
| 29. Counter productive | **- Tacab Khasaarin/ Maax dumin** |
| | **- Lid ku ah** |
| 30. Criteria | **- Cabirka wax lagu saleeyo** |
| | **- Shuruudo wax lagu saleeyo** |
| 31. Critique | **- Dhaleeceyn** |
| 32. Decision Maker | **- Goa'aamiye** |
| 33. Definition | **- Qeexid** |
| 34. Delegation/Delegate | **- Wakiilasho** |
| | **- Ergo** |
| 35. Democracy | **- Demoqraadiyad** |
| 36. Description | **- Qeexid** |
| | **- Sifo** |
| | **- Sharax** |
| 37. Dialogue | **- Wada Hadal** |
| 38. Effective | **- Wax ku ool** |
| | **- Sidii la rabay wax u tarid** |
| 39. Effective leadership | **- Hogaaminta wax ku oolka ah** |
| 40. Efficiency | **- Wax qabad fiican leh** |
| 41. Elected Leadership | **- Hogaaminta la doortay** |
| 42. Empower/Empowerment | **- Awood siin** |
| | **- Awood u fasaxid** |
| 43. Enabler/Enable | **- Karti galin** |
| | **- Kartigeliye** |
| 44. Essay | **- Qormo** |
| | - **Maqaal** |
| 45. Ethical | **- Hab-dhaqan/ Anshax** |
| 46. Evaluation/Evaluate | **- Qiimayn** |
| 47. Evaluation Survey | **- Qiimayn Sahan** |

| | |
|---|---|
| | **- Baaritaan qiimayneed** |
| 48. Exercise | **- Layli** |
| 49. Facilitator | **- Fududeeye/Sahle** |
| 50. Feed back | **- War Celin** |
| | **- Jawaab Celin** |
| 51. Financier | **- Masuul Maaliyadeed.** |
| 52. Gender | **- Lammaane** |
| 53. Goal | **- Hadaf** |
| | **- Yool** |
| 54. Good Governance | **- Maamul Wanaagsan** |
| | - Dowlad wanaag |
| 55. Government | **- Xukuumad** |
| 56. Group Discussion | **- Dood kooxeed** |
| 57. Guide | **- Tilmaamid** |
| | **- Hage** |
| 58. Hand Book | **- Tilmaan Bixiye** |
| | **- Tilmaame Bare** |
| 59. Human Resources | **- Khayraadka Dadka** |
| 60. Human Settlement | **- Deegaamaynta Aadanaha** |
| | **- Degaamayn** |
| 61. Implementation | **- Hirgalin** |
| | **- Fulin** |
| 62. Information | **- Xog** |
| | **- Wargelin** |
| 63. Institution | **- Haya'ad** |
| 64. Institution Builder | **- Haya'ad Dhise** |
| 65. Institutionalise | **- Hay'adeeye** |
| 66. Instruction | **- Amar** |
| | **- Wax barasho** |
| | **- Wax barid** |
| 67. Key Point | **- Qoddobbo Muhiim ah.** |
| | **- Qoddobbo Ma Dhaafaan ah** |
| 68.Leadership Process | **- Geedi socod Hoggaamineed** |
| 69. Learning | **- Barasho** |
| | **- Wax Barasho** |
| | **- Tacliin Barasho** |
| 70. Learning Objective | **- Ujeeddooyinka Barashada** |
| | **- Yoolka Barashada** |
| 71. Local Government/Authority | **- Dawladda Hoose** |
| 72. Majority | **- Aqlabiyad** |
| | **- Inta Badan** |
| 73. Management Process | **- Geedi Socodka Maaraynta** |
| 74. Meeting | **- Kulan** |

| | |
|---|---|
| | **- Shir** |
| 75. Minority | **- Inta Yar** |
| | **- Laga tiro badan yahay** |
| 76. Minutes | **- Hadal Qor** |
| | **- Hadal qoraal** |
| 77. Mission | **- Ergo** |
| | **- Risaalo** |
| 78. Monitoring | **- La socod** |
| | **- La saan qaad** |
| 79. Negotiation/Negotiator | **- Wada Xaajood siiye** |
| | **- Wada Hadal siiye** |
| | **- Gorgoriye** |
| 80. Networking | **- Shabakadeyn/Nidaam hawleed oo wada shaqaynaya** |
| 81. Organization | **- Urur** |
| 82. Overseer | **- Korjooge** |
| 83. Overview | **- Dulmar/Guud Mar** |
| 84. Participants | **- Ka-qayb-galayaasha/Kaqayb-qaatayaasha** |
| 85. Perception | **- Faham/Dhugmo/Garasho** |
| 86. Performance | **- Waxqabad/Fulin Hawleed** |
| 87. Perspective | **- Ka eegid wajio kala duwan** |
| 88. Policy | **- Qorshe Hawleed/Khidad/Siyaasad** |
| 89. Policy Maker | **- Siyaasad Dejiye** |
| 90. Power Broker | **- Awood wax ku qabte/Awood adeegsade** |
| 91. Presentation | **- Soo Bandhigid/ Soo Jeedin** |
| 92. Proactive | **- Ka hor degid**/Qorshe Curiye |
| 93. Process | **- Geedi socod/Socodka** |
| 94. Questionnaire | **- Weydiimo Qoran/weydiimo taxane ah/weydiimo Sahan ah** |
| 95. Quorum | **- Tirada ugu yar ee shirku ku ansixi karo** |
| 96. Rational | **- Maan-gal/Macquul** |
| 97. Reactive | **- Falcelin/Qorshe laawe/Arrin ku baraarug** |
| 98. Reference | **- Tixraac/Raad raac** |
| 99. Reflection | **- Milicsi**/ Faham celin |
| 100. Resources | **- Khayraad** |
| 101. Revenue | **- Dakhli** |
| 102. Role play | **- Door-jelid**/Door ciyaarid/ Door Matalid |
| 103. Session | **- Fadhi/Kulan** |
| 104. Shared Vision | **- Aragti wadaag** |
| 105. Simple Majority | **- Aqlabiyad hal dheeri ah** |
| 106. Simulation | **- Iska yeelid/U ekeysiin** |
| 107. Slums | **- Buul caws/Carshaan/Isku raran** |
| 108. Solution | **- Furdaamin/Xal** |

| | |
|---|---|
| 109. Stakeholders | **- Daneeyayaal** |
| 110. Strategic Plan | **- Qorshe istaratijiyadeed** |
| 111. Strategy | **- Istaratijiyad/Tab/xeelad** |
| 112. Summary | **- Soo koobid/Khulaaso** |
| 113. Symptoms | **- Astaamo/ Calaamado** |
| 114. Systematic | **- Habaysan/Nidaamsan** |
| 115. Technique | **- Farsamo/Xeelad** |
| 116. Training Design | **-JaanjooyadaTababarka/Naqshadeynta Tababarka** |
| 117. Training Material | **- Agabka Tababarka/Qalabka Tababarka** |
| 118. Training Need Assessment | **- Qiyaasid baahida Tababarka/ Qiimeynta Baahida Tababarka** |
| 119. Transparency | **- Daahfurnaan**/ Hufnaan/Wax qaris laa'aan |
| 120. Transparent | **- Qof aan waxba qarinaynin**. |
| 121. Unanimous | **- Loo dhan yahay/Gidigood** |
| 122. Vision | **- Aragti fog/Aragti dheer** |
| 123. Warm up exercise | **- Iskulalayn/Qandhicin/Diiran** |
| 124. Workshop | **- Aqoon Isweydaarsi** |
| **Priority two words** | |
| 125. Acknowledgment | **- Garwaaqsi/Garawsi/Mahad-celin** |
| 126. Administrative Fixes | **- Adeegsi** |
| 127. Analysis | **- Gorfeyn**/Falanqeyn/Taxliilin/ kala shiilid. |
| 128. Assignment | **- Shaqo Mucayin ah** |
| 129. Assumption | **- Maleyn/Si u qaadasho** |
| 130. Benchmark | **- Bar qiyaaseed/Bartilmameed** |
| 131. Challenges | **- Caqabad/Loolan/Hardan** |
| 132. Collective | **- Kooxeed/Urureed/Wadareed** |
| 133. Conceptual frame work | **- Qaab-dhismeed-fikrad** |
| 134. Constructive | **- Wax dhisid/Dhismo-gal** |
| 135. Conventional Wisdom | **- Xikmad soo jireen ah** |
| 136. Corruption | **- Musuq-maasuq/Laaluush.** |
| 137. Dilemma | **- Laba daran mid dooro** |
| 138. Diversity | **- Kala duwanaan/Kala gedisnaan** |
| 139. Encouraging | **- Dhiiri-galin/Geesinimo galin** |
| 140. Fundamental | **- Asal/Aasaasi** |
| 141. Identification | **- Tilmaamid/Baadi sooc/Aqoonsi** |
| 142. Individual Contribution. | **- Gacan ka geysi qofnimo/In qof biiri** |
| 143. Infrastructure | **- Dhismo-hooseed**. |
| 144. Input | **- Wax galin** |
| 145. I*nsight.* | **- Aragti Maskaxeed** |
| 146. Inspiration | **- Maan-godlin/Ra'yi fiican helid** |
| 147. Interaction | **- Isdhex-gal/isla fal-gal/Isku dhafmid** |
| 148. Judgement | **- Xukun/Go'aan** |

| | |
|---|---|
| 149. Land Use Malaise | **- Aafada dhul boobka/Dhul ku habsa** |
| 150. Multipurpose | **- Ujeeddo badan/Ujeedooyin kala du** |
| 151. Output | **- Wax ka soo saarid** |
| 152. Potential Candidate | **- Musharax dihin/Musharax iman kara** |
| 153. Pre-training | **- Tababar horaad/Tababar hortiis** |
| 154. Priority | **- Mudnaan** |
| 155. Problem Solver | **- Furdaamiye/Xaliye dhib** |
| 156. Proficiency | **- Xirfad Hanasho/Aqoon sare u leh** |
| 157. Public | **- Dan guud** |
| 158. Public Sector | **- Qeybta Dowladda** |
| 159. Public Service | **- Adeeg guud** |
| 160. Regulation | **- Xeer Hoosaad** |
| 161. Self Governance | **- Is-xukumid**/Ismaamulid**.** |
| 162. Self Introduction | **- Is-sheegid/Is-tilmaamid** |
| 163. Self study | **- Wax- Isbarid** |
| 164. Self Assessment | **- Isqiyaasid/Isqiimeyn** |
| 165. Shrinking Resources | **- Khayraadka sii yaranaya** |
| 166. Technical | **- Farsamo/Farsamayn** |
| 167. Training needs | **- Baahi tababar** |
| **Priority three Words** | |
| 168. Absolute Poverty | **- Saboolnimo** |
| 169. Absolute | **- Gebi-ahaan/Buuxda** |
| 170. Application Commitments | **- Nidar-fulin/Daba-qaad ballan** |
| 171. Bureaucracies | **- Biroqraadiyad/Xafiisyad Dawladda oo shaqadoodu gaabis tahay** |
| 172. Caution | **- Taxadar/Digniin** |
| 173. Density | **- Cufnaan/Jirmiga shega** |
| 174. Environmental Degradation | **- Hoos u dhac deegaan**/deegaan burburin |
| 175. Equilibrium | **- Dheeli-tir/Is-le'eg** |
| 176. Hawker | **- Ha is wareerin/Dadka badeecada naadiya** |
| 177. Implication | **- Maldahnaan/Hadal aan dhab loo muujin laakiin laga fahmi karo wajiga qofka** |
| 178. Jurisdiction. | **- Haya'addaha Garsoorka** |
| 179. Legal Requirement. | **- Baahida Sharciyeed** |
| 180. Legislation | **- Xeer Dejin** |
| 181. Legitimate | **- Sharci ahaan**/La aqbali karo |
| 182. Matchmaker | **- Isku aadiye wax isku habboon** |
| 183. Misinterpretation | **- Fasiraad xumo/Fasiraad qaldan** |
| 184. Off-spring | **- Farac** |
| 185. Optimistic | **- Samo-filasho/Samo arag/Dhanka Wanaagsan ka eeg** |
| 186. Partnership | **- Wadaag/Wada lahaansho** |
| 187. Pessimistic | **- Xumo arag/Xuma filasho/Dhanka xun ka eeg** |

| | |
|---|---|
| 188. Phenomena | **- Ifafaalayaal** |
| 189. Professional | **- Xirfadle/Xeel-dheeri** |
| 190. Recycle | **- Sameyn celin/Dib u nacfi galin** |
| 191. Rules | **- Qawaaniin/Xeer** |
| 192. Status Quo | **- Xaalad taagan** |
| 193. Stimulation | **- Xiiso galin/Fi-fircooni galin** |
| 194. To Wear Different Hats | **- Xilqaad badnaan/Kaalimokala duwan qaa** |
| 195. Water Pollution | **- Biyo wasakhow**/Wasakhaw Biyood/dhiiqo |
| 196. Facilitator | **- Fududeeye** |
| 197. Financier | **- Masuul Maaliyadeed** |
| 198. Gender | **- Lammaane** |
| 199. Negotiator | **- Gorgoriye/Wada hadal siiye.** |
| 200. Overseer | **- Korjooge** |
| 201. Policy Maker | **- Siyaasad dejiye** |
| 202. Power Broker | **- Awood Adeegsade.** |
| 203. Institution Builder | **- Hay’ad dhise** |